JamhuuriyadaFederalkaSoomaaliya

**DowladGoboleedkaHirshabeelle**
**XafiiskaMadaxweynaha**

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the President**

**Ref: DGHSH/XMM/N/0121/18** **Tr: 19/03/2018**

**XEER MADAXWEYNE Lr 121**

Madaxweynaha Dowlad goboleedka hirshabeele markii uu arkay qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee dastuurka dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay baahida loo qabo in la helo sharciyo iyo xeerar lagu Maareeyo Maaliyadda Dadweynaha, xeer daqli iyo xeernidaamiyeyaashiisa, iyo in la helo xeer lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 18/02/2018 ee uu tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/003/18** ee ku aadaanaa ansixinta sharciga Dakhliga iyo xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018 iyo kan kale ee la soo saaray isla taariikhdaas ee uu tirsagiisa yahay **GSHDDGHSH/004/18** ee ku aadan ansixinta sharciga lagu dhisayo wasaaradda maaliyadda 2018 iyo sharciga kale ee lagu ansixiyey sharciga maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018 oo isna tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/005/18** ee la soo saaray taariikh 05/03/2018.

Madaxweynaha dowlad goboleedka hirshabeele waxa uu xeeriyey in qaraarada baarlamaanka ee

1. Sharciga Dakhliga Iyo Xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018
2. Sharciga Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda 2018
3. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 19/03/2018
xeer lamber 121

Maxamed Cabdi Waare
Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele

Jowhar, Hirshabelle State of Somalia. Tel+252616652530 Email: president@hirshabelle.gov.so

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabelle
Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboledka Hirshabeelle

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولايةاقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس اللنواب هرشبيلي

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the speaker**

**Ref:** XGBDGHSH / 119/18: الرقم

Jowhar, 05th March 2018 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Wasiirka Maaliyada Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG:Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka BDGHSH** =Jowhar=

**OG:Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejeinta Hirshabelle** =Jowhar=

**Ujeedo ;-Qaraarka Baarlamanka ee Anxisinta Sharciga Mareynta Maaliyada Mamulka 2018**

**Mudane Madaxweyne**

Waxaan halkaan kugu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Sharci Dejinta Lr. GSHDDGHSH/005/18 ee 25-02-2018 oo Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle go'aan kagaaray **Ansixinta Sharciga Maareynta Maaliyada Maalulka 2018** oo halkaan ku lifaaqan isagoo Go'aamiyey qodobada Soo Socda

**Qodobka 1aad**

Ayadoo ay Goob joog yihiin Golaha 51 Xildhibaan Kalfadhigii 3aad fadhigiisa 13-aad ee 25-02-2018 wuxuu codeyn wadar oggol ah ku ansixiyey **Sharciga Maareynta Maaliyada Maamulka 2018** si loogu fuliyo Qorshe Hawleedka Dowlada

**Qodobka 2aad**

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne Kugu wargelinayaa inaad Xeer Madaxweyne kusoo saarto **Sharciga Maareynta Maaliyada Maamulka 2018** Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGHSH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah

**Sheikh Osman Barre Mohamed**

**Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle**

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE JFS XAFIISKA GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE ولاية اقليم هر شبيلي مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي OFFICE OF THE SPEAKER FRS HIRSHABELLE STATE

**Tix/GSHDDGHSH/005/18** **25da febrayo 2018**

**Qaraarka Golaha Sharcidejinta DGHSH**

**Kalfadhiga 3aad Kulankiisa 13aad.**

# DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE.

# GOLAHA SHARCI DEJINTA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRHSABELLE

# QARAAR KUSAABSAN

## Ansixinta Sharciga Maareynta Maaliyada Maamulka Dadweynaha 2018

**JOWHAR 25,FEBRAYO,2018**

## Qaraarka Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle

## Golaha sharci Dejinta Hirshabelle

**Markuu arkay:** Warqada Codsiga Madaxweyne kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle tirsigeedu yahay DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06/02/2018 oo kusaabsan in la ansixiyo Hindise sharciyedka kor kuxusan si ay u fududaato fulinta Qorshe Howledka xukuumada

**Markuu arkay:** Qodobka 33aad ee Xeer hoosadka Golaha sharci Dejinta kuna saabsan Habraaca Ansixinta Hindise Sharciyedyada si ay u noqoto Sharci kadib Ansixinta Baarlamanka.

**Markuu Dhageystay :** Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedyedkan oo ku taariikhsan 23-02-2018

### GOLUHU WUXUU GUDDOONSADAY QODDOBADA HOOS KUXUSAN;

### Qodobka 1aad

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee xeer hoosaadka Golaha sharci Dejinta oo xeerinayo Habraaca Ansixinta Hindise Sharciyedyada si ay u noqdaan sharci kadib ansixinta Baarlamanka.

Golaha Sharci Dejinta Kalfadhigii 3aad kulankiisa 13aad ee 25ka febrayo 2018 oo ay goobjoog yihiin **51** Xildhibaan codeynaya waxay Hindise sharciyedka Maareynta Maaliyada Maamulka Dadweynaha 2018 ku ansixiyeen Cod furan:

| | |
|---|---|
| Oggol: | 49 (afartan iyo sagaal Xildhibaan) |
| Diiday: | 1 ( Hal Xildhibaan) |
| Ka Aamustay: | 1 (Hal Xildhibaan ) |

**JOWHAR 25,FEBRAYO,2018**

J F S DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE
F R OFFICE OF SPEAKER

## Qodobka 2aad

**Meel Marinta Sharciga Maareynta Maaliyada Maamulka Dadweynaha ee 2018**

**Qaraarka Golaha oo ay kulifaaqan yihiin Dhamaan Dokumentiga kor kuxusan oo ah qayb qaraarkan kamida waxaa lagu soo saaraya xeer Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 51aad Faqrada 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle waxaana lagu soo saaraya faafinta Rasmiga ah ee Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**Mahadsanid**

**M.ne Sh. Cusmaan Bare Maxamed**

**Gudoomiyaha Golaha Sharci Dejinta DGHSH.**

----------------------------

## Lifaaqyada:

- **Codsiga Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle Lr. DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06-02-2018**
- **Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobta oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedyadan oo ku taariikhsan 23-02-2018**

**JOWHAR 25,FEBRAYO,2018**

# Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

**Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha**

**ee**

**Dowlad-goboleedka Hirshabeelle**
**Soomaaliya**

**2018**

TUSMO


**Madaxa I. Qodobbo Guud** ........ **4**

Qaybta 1aad. Magaca, Hadafka iyo Baaxadda ........ 4

Qaybta 2aad. Mabaa'diida ........ 5

Qaybta 3aad. Qeexaha ........ 6

Qaybta 4aad. Maaliyadda/Lacagta Maamulka/Dadweynaha iyo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ........ 10

**Madaxa II. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Dad Ka Saaran Miisaaniyadda iyo Maareynta Maaliyadda Dadweynaha** ........ **12**

Qaybta 5aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Madaxweynaha; ........ 12

Qaybta 6aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Wasiirka ........ 12

Qaybta 7aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadda Soo Saarista Xeer-nidaamiyeyaal iyo Amarro ........ 13

**Madaxa III. Diyaarinta iyo Ansaxinta Miisaaniyadda** ........ **13**

Qaybta 8aad. Xaaladda iyo Qaabka Miisaaniyadda ........ 13

Qaybta 9aad. Wadar u xisaabinta iyo Xadka ay Gaareyso Miisaaniyadda ........ 14

Qaybta 10aad. Saa'id-Naaquska Miisaaniyadeed ........ 15

Qaybta 11aad. Meertada iyo Kalandarka Miisaaniyad-diyaarinta ........ 15

Qaybta 12aad. Dokumentiyada iyo Waxyaabaha ku jira Miisaaniyadda La Soo Jeedinayo ........ 15

Qaybta 13aad. Lafagurista Saameynta Maaliyadeed ee uu Keeni Karo Sharci-qabyo ah. ........ 16

Qaybta 14aad: Qoondeynta Ku-talogalka ah/Waxyaabaha Soo Kordha ........ 17

Qaybta 15aad. Helidda Dadweynaha ee Miisaaniyadda ........ 17

Qaybta 16aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadda Baarlamaanku Ku Leeyahay Ansaxinta Miisaaniyadda ........ 18

Qaybta 17aad. Wax-ka-beddel ay Sharci-dejintu ku Sameyso Miisaaniyadda La Soo Jeediyey ........ 18

Qaybta 18aad. Maaliyadsiin Ku-meelgaar ah iyo Qaadashada/dhaqangelinta Miisaaniyadda ........ 18

Qaybta 19aad. Miisaaniyado Dheeri ah iyo Dib-u-eegista Bartamaha Sanadka ........ 18

**Madaxa IV. Fulinta Miisaaniyadda** ........ **19**

Qaybta 20aad. Mas'uuliyadaha La Xiriira Fulinta Miisaaniyadda Mideysan ........ 19

Qaybta 21aad. Marxaladaha Fulinta Miisaaniyadda ........ 20

Qaybta 22aad. Xeerarka Guud ee La Xiriira Fulinta Miisaaniyadda ........ 20

Qaybta 23aad. Qorsheyaasha Sanadlaha ah ee Dakhliga iyo Kharash-gareynta ........ 21

Qaybta 24aad. Qandaraasyada iyo Wax-soo-iibsiga ........ 22

Qaybta 25aad. Kantaroolidda/Xakameynta Ballanqaadyada ........ 23

Qaybta 26aad. Dib-u-kala qoondeynta Miisaaniyadda Mideysan ........ 24

Qaybta 27aad. Qoondeymaha oo Waqtigoodu Dhaco Dhammaadka Sanad-Maaliyadeedka ..... 24
**Madaxa VI. Maareynta Lacagaha Caddaanka ah iyo La-Tacaamulka Bankiga ..... 24**
Qaybta 28aad. Maareynta Lacagaha Caddaanka/kaashka ah ..... 24
Qaybta 29aad. La-tacaamulka Bankiyada ..... 25
**Madaxa VII. Xisaabaadka iyo Warbixinnada ..... 25**
Qaybta 30aad. Xisaabaadka ..... 25
Qaybta 31aad. Warbixinta ..... 26
Qaybta 32aad. Xisaabta ugu Dambeysa ee Miisaaniyadda Mideysan iyo Hantidhowrka Dibadda ..... 27
Madaxa VIII. Amaah-qaadashada, Daymaha Maamulka, Damaanadaha Dowladda iyo Maareynta Gargaarka ..... 28
Qaybta 33aad. Qaabka-guud ee Maareynta Gargaarka iyo mas'uuliyadaha ururrada aan dowladiga ahayn ..... 28
**Madaxa IX. Kantaroolka Gudaha iyo Hantidhowrka ..... 29**
Qaybta 34aad. Kantaroolka Gudaha iyo Hantidhowrka ..... 29
**Madaxa X Ciqaabaha kala duwan ..... 30**
Qaybta 35aad. Ciqaabaha ..... 30
**Madaxa XI. Diyaarinta iyo Ansaxinta Miisaaniyadda ..... 30**
Qaybta 36aad. Dokumentiyada iyo Waxyaabaha ku jira Miisaaniyadda La Soo Jeediyey ..... 30
**Madaxa XII. Maareynta Lacagaha Caddaanka ah iyo La-tacaamulka Bankiyada 30**
Qaybta 37aad. La-tacaamulka Bankiyada ..... 30
Qaybta 38aad. Amaah-qaadashada Dowladda ..... 31
Qaybta 39aad. Damaanadaha Dowladda ..... 31
Qaybta 40aad. Qaabka-guud ee Maareyta Gargaarka iyo mas'uuliyadaha ururrada aan dowliga ahayn ..... 32
Qaybta 41aad. Qandaraas-bixinta/Ka-warbixinta Daynta ee Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay iyo Macaahidda Maaliyadda Maaulka/Dadweynaha ..... 33
Qaybta 42aad. Diiwaangelinta Daymaha Maamulka/Dowladda iyo Ka-warbixintooda. ..... 34
**Madaxa XIV. Hay'adaha Madax-bannaanida Hoose haysta iyo Sanaadiiqda Gaarka ah (Waa La Dib Dhigey) ..... 34**
Qaybta 43aad. Ku-dhaqanka qodobbada guud ee maareynta maaliyadda ee uu dhigeyo Xeerkan ..... 34
Qaybta 44aad. Soo-gudbinta iyo Dhammeynta Miisaaniyadaha hay'adaha madax-bannaanida hoose, madax-bannaani yar haysta iyo tan Sanaadiiqda Gaarka ah ..... 35
Qaybta 45aad. Warbixinnada sanadka dhexdiisa iyo Xisaabaadka Sanadlaha ah ee hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta, kuwa madax-bannaanida yar haysta iyo Sanaadiiqda Gaaarka ah ay soo saaraan ..... 35
Qaybta 46aad. Lacagaha Dheeriga ka ah baahidooda ee ay bixiyaan hay'adaha madax-bannaanida hoose iyo kuwa madax-bannaanida yar haysta ..... 36

**Madaxa XV. Qodobbo gaar ah oo la xiriira Wakaaladaha Dowladdu Leedahay (Waa La Dib Dhigey) 36**

Qaybta 47aad. Hawsha loo igmadey iyo Baaxaddeeda ........ 36

Qaybta 48aad. Qorsheyaasha Maaliyadeed ee Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay 37

Qaybta 49aad. Warbixinnada sanadka dhexdiisa iyo Xisaabaadka Sanadlaha ah ee Ganacsiyada/Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay ........ 37

Qaybta 50aad. Siyaasadda Faa'iido-qaybinta ........ 37

**Maxada XVII. Qodobbada Kama-dambeynta ah ........ 38**

Qaybta 51aad. Dhaqangalka ........ 38

## CUTUBKA A HORUDHAC

### Madaxa I. Qodobbo Guud

### Qaybta 1aad. Magaca, Hadafka iyo Baaxadda

1. Xeerkan Baarlamaanku soo saarey waxaa uu magaciisu yahay "Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee 2018".

2. Xeerkan waxaa lagu maamulayaa guud ahaan arrimaha la xiriira Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Waxaa uu dhigeyaa habraacyada loo maro diyaarinta, ansaxinta, fulinta iyo xisaabaadka ugu dambeeya ee Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo arrimaha xiriirka la leh oo ay ka mid yihiin kontoroolidda, xisaabinta iyo sameynta hartidhowrka gudaha ee maaliyadda maamulka/dadweynaha. Xeerkan waxaa kaabi doona **xeer-nidaamiyeyaal** taageeraya oo ay faafinayso Wasaaradda Maaliyadda kuwaas oo sii faahfaahinaya habraacyada mowduuc kasta oo halkaan lagu xusey, kuwaas oo wax laga beddeli karo muddo ka dibba. Baarlamaanka, oo fulinaya mas'uuliyadaha ka saaran kormeeridda, waa in uu hubiyaa in dhammaan xeer-nidaamiyeyaasha la soo saarey iyada oo la raacayo Xeerkan ay ahaadaan kuwo waafaqsan oo la jaanqaadaya Xeerka.

3. Qodobada ku jira Xeerkan waxaa ay qabanayaan dhammaan hay'adaha (wakaaladaha) iyo mu'asasooyinka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle. Xeerkan dhexdiisa Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa soo hoos gelaya:

   (a) Laanta Fulinta iyo dhammaan hay'adaheeda kala duwan

   (b) Baarlamaanka iyo dhammaan hay'adahiisa kala duwan

   (c) Laanta Garsoorka iyo hay'adeeda kala duwan

   (d) Hay'adaha (wakaaladaha) Madax-bannaanida Hoose Haysta ee Maamulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya hoos yimaada.

Intaa waxaa dheer, wakaaladaha gaarka ah ee lagu xusey (e) iyo (f) ee hoose waxaa qodobbada Xeerkan lagu maamulayaa marka si gaar ah loogu sheego qodobbo gaar ah oo Xeerkan ka mid ah.

   (e) Wakaaladaha (ganacsiyada) uu dowlad goboledku leeyahay

(f) Qof ama hay'ad/sharikad gaar ah oo heleysa ama isticmaaleysa maaliyadda maamulka/dadweynaha.

**Qaybta 2aad. Mabaa'diida**

Maareynta maaliyadaha maamulka/dadweynaha ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo ay ka mid tahay diyaarinta iyo fulinta Miisaaniyadda Mideysan iyo waxyaabaha dheeriga ah ee soo raaca waxaa hagaya mabaa'diida soo socda:

(a) *Isla Xisaabtan*: Dhammaan xubnaha Baarlamaanka waxaa lagula xisaabtamayaa sida ay uga soo baxaan mas'uuliyadahooda la xiriira maareynta maaliyadaha dadweynaha ay u dhiibteen; Laanta Fulinta dhexdeedana, dhammaan saraakiisha loo dhiibo mas'uuliyada ay ku maamulaan maaliyad dadweyne waxaa uu Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya kula xisaabtamayaa sida ay si habboon ugu gudanayaan waajibaadkooda.

(b) *Sanadle.* Awoodda qoondeynta miisaaniyadda waxaa muddo sanad-maaliyadeedka ah bixiya Baarlamaanka, haddii aaney jirin shuruuc si gaar ah u sheegeysa.

(c) *Miisaaniyad Dheelli-tiran.* Miisaaniyadda Mideysan dhexdeeda, dakhliga iyo maaliyadaha dad soo gala waa in ay iskudheellitirnaadaan kharashaadka iyo maaliyadaha baxaya.

(d) *Guud ahaansho.* Dhammaan dakhliga soo gelaya iyo kharashaadka baxaya ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay ku jiraan Miisaaniyadda Mideysan, iyaga oo u qoran qaab wadar guud ah.

(e) *Gaar ahaansho*: Dhammaan dakhiga soo gelaya iyo kharashaadka baxaya ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay la socdaan faahfaahinta ku qoran Miisaaniyadda Mideysan ee ay tilmaamayaan Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha taageeraya.

(f) *Sugnaansho*: Miisaaniyadda Mideysan waa in loo diyaariyaa qaab maaliyadeed oo muddada dhexe ah iyada oo looga dan leeyahay in ujeeddooyinka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ee lagu xaqiijiyo muddo sanado badan ah.

(g) *Daah-furnaan*: Doorarka/kaalimaha ay kala leeyihiin kuwa lagu aaminey maareynta maaliyadda waa in ay ahaadaan kuwo si cad loogu faahfaahiyey Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha la soo saaro ee isaga faahfaahinaya. Xeerkan waxaa uu waajibineyaa in macluumaad maaliyadeed oo la isku halleyn karo oo aan waqtigiisuna daahin oo ku saabsan Miisaaniyadda Mideysan ay dadweynuhu heli karaan, waxaana ay waajibineysaa in shuruucda lagu maamulo maaliyadaha dadweynaha loo qoro si cad.

(h) *Mideysnaan*: Miisaaniyadda Mideysan waa dokumentiga ansaxinaya qiyaasaha sanadka ee dakhliga, kharashaadka, iyo mucaamalaadka maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya; dhammaan kuwaan waxaa laga dhigayaa dokumenti qura waxaana lagu ansaxinayaa sharciga miisaaniyad-sanadeedda, oo ay ka mid yihiin qoondeymaha sanadlaha ah.

**Qaybta 3aad. Qeexaha**

Marka laga reebo qodob sharci oo gaar ah uu waajibinayo, ereyadan soo socda ee ku jira Xeerkan, waxaa Xeerkan dhexdiisa, macnahoodu ku kala ahaanayaa sida loogu qeexay Qaybtan xeerka ka mid ah:

*"Hay'ad ka tirsan Dowladda"* ama *"Hay'ad Dowladeed"* waxaa ka mid ah wasaarad, hay'ad madax-bannaan, qayb, xafiis, gole, guddi, mac-had, maamul, urur ka tirsan Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo ay ka mid yihiin degmooyinka, magaalooyinka waaweyn, magaalooyinka yaryar, tuulooyinka iyo maamullada degaanka ama qayb-hoosaadyada kale ee siyaasadeed ama dowladeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

"*Hantidhowrka Guud*" waxaa loola jeedaa Hawti-dhowrka Guud ee madaxda ka ah Hantidhowrka Guud ee uu dhisayo Qodobka 60aad ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Dowlad goboleedka Hirshabelle.

"*Hay'ad Madax-bannaani Hoose Haysata*" waa hay'ad is-maamul-hoose haysata oo ay abuurto Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo mas'uul ka ah in ay qaadato go'aamo sharci ah, in ay diyaariso qorshaheeda istiraatiijiga ah oo go'aamadaas wixii ka dhashana mas'uuliyaddeedu ay iyadu qaadaneyso oo aan wax faragelin ah kaga imaaneynin ama faragelin aad u kooban kaga imanaysa Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

*"Qaybaha ballaaran ee kharash-gareynta ama qayb weyn oo kharash-bixin ah"* waxaa uu macnaheedu yahay nooca kharash-gareyn oo ah heerka ugu sarreeya ee mideynta sida ay qeexayso Qaybta 8aad ee Xeerkan.

"*Bankiga Dhexe ee Soomaaliya*" ama "*Bankiga Dhexe*" waxaa loola jeedaa hay'addii lagu dhisey Xeerka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee Xeer Lambar 130 ee soo baxay 22 April 2011.

*"Shaxda Xisaabaha"* waxaa loola jeedaa liis habeysan oo dhigaya xisaabo lagu kala sooco laguna qoro wax is-dhaafsiyada dakhliga iyo kharash-gareynta miisaaniyadda, iyo sidoo kale hantida iyo qaanta dowladda.

"*Ballanqaad*" waxaa uu macnahiisu yahay ballan la ballanqaadey bixinta kharash ka dib marka laga soo baxo heshiis rasmi ah taas oo ay ka dhalaneyso lacag ay dowladdu/maamulku bixiyo;

"*Miisaaniyadda Mideysan*" waxaa loola jeedaa Miisaaniyadda uu Baarlamaanku u ansaxiyey sanad maaliyadeed.

"*Sanduuqa Maaliyadda Mideysan*" waxaa loola jeedaa sanduuqa mideynaya dhammaan dakhliga dowladeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, oo loo isticmaalo bixinta lacagaha, sida ku qeexan Qaybta 4aad ee Xeerkan;

"*Qoondeyn ku-talogal ah*" waxaa uu macnaheedu yahay maaliyadda loo qoondeeyey Miisaaniyadda Mideysan ama Miisaaniyadaha Dheeriga ah iyada oo hadafka laga leeyahayna uu yahay in lagu bixiyo kharashaad degdeg ah oo aan horey loogu sii xisaabtamin;

"*Golaha Wasiirrada*" waa hay'adda fulinta ee ugu sarreysa Dowladda waxaana ay qayb ka tahay Laanta Fulinta ee Dowladda Hirshabeelle. Xubnaha waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha iyada oo Baarlamaanka Dowlad-goboleedku uu u ansaxinayo wadar ahaan. Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Golaha Wasiirradu waxaa tilmaamaya Qodobka 56aad ee Dastuurka Hirshabeelle.

"*Xeer la diidi karo*" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta Xeer-nidaamuyuhu dhaqangal noqon.

"*Sanad-maaliyadeed*" waxaa loola jeedaa muddo toban iyo laba bilood oo is xigxiga ah oo qiyaasaha miisaaniyadda iyo hawlgalladeeda la diiwaangelinayo, lagu xisaabtamayo lagana warbixinnayo; waxaa uu bilowdaa maalinta 1aad ee bisha Jannaayo waxaana uu dhammaadaa maalinta 31aad ee Disembar ee sanadka;

"*Ammaah Dowladeed*" waxaa loola jeedaa amaahasho kasta oo muddo dhow, muddo dhexe, ama muddo dheer ah, daymo ama qandaraasyo maaliyadeed, oo ay ka mid yihiin qandaraasyada kireysashada iyo waraaqaha ballanqaadka lacagaha oo ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya bixiso.

"*Hanti Dowladeed*" waxaa loola jeedaa dhammaan hantida guurtada ah iyo tan ma-guurtada ah iyo/ama alaabada ay leedahay, ama ay gacanta ku hayso, Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo ay ka mid yihiin dhul, dhismayaal, warshad, baabuur, mashiinno iyo qalab.

*"Madaxa Hay'adda/Wakaaladda"* ama *"Madaxa Unugga Kharash-gareynta"* waxaa loola jeedaa Wasiirka marka laga hadlayo Wasaarad ama sarkaalka fulinta ee ugu sarreeya marka laga hadlayo hay'ad/wakaalado ama macaahid;

*"Tilmaammo/amarro"* waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo

*"Wasaarado Kale"* waxaa loola jeedaa dhammaan Wasaaradaha kale ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya marka laga soo reebo Wasaaradda Maaliyadda.

*"Wasiirka"* waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

*"Wasaaradda"* waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

*"Ururro aan dowli ahayn"* waxaa loola jeedaa shakhsiyad qaanuuni ah (haddii uu yahay muwaadin Jamhuuriyadda u dhashey ama mid dal kale u dhashey) ama hay'ad aan ahayn mid dowladeed/maamul (haddii loo abuuro, loo dhiso, loo diiwaan-geliyo, ama si kale awood loogu siiyo in hawlaheeda ku qabato sharciga Jamhuuriyadda ama sharci dal kale) oo heshey ama heli doonta lacag, hanti ama kheyraad kale oo qayb ka ah kheyraadka maamulka/dowladda, si uu qofkaas ama hay'aadaas ugu isticmaalaan Jamhuuriyadda gudaheeda hawlo laga leeyahay ujeeddo dadweyne/shacab oo aan ka ahayn sameynta meel dadku ay ku cibaadeystaan, diin lagu baro; ama samafal.

*"Baarlamaanka"* waxaa loola jeedaa laanta sharci-dejinta, oo ah laanta la soo doorto ee dowladda ee mas'uuliyaddeedu tahay in ay matasho dadka soo doortey, sameynta sharciyada iyo kormeerka hawlaha dowladda iyada oo u mareysa dhegeysiyo iyo baaritaanno. Baarlamaanku waa sida uu u qeexayo Qodobka [29aad] ee Dastuurka Hirshabeelle.

*"Miisaaniyad La Soo Jeediyey"* waxaa uu macnaheedu yahay Miisaaniyadda Mideysan oo qabyo ah oo uu Wasiirku u gudbiyey Baarlamaanka isaga oo raacaya Qaybta 11aad ee Xeerkan.

*"Maareynta Maaliyadda Dadweynaha "*: waxaa loola jeedaa nidaamyada iyo geeddi-socodyada sharci iyo maamul ee hubinaya in si hufan, dhaqaaleysan oo wax soo saar leh oo kheyraadka dadweynaha/maamulka loogu adeegsado si waafaqsan jaangooyooyinkii hore loo qeexay

*"Maaliyad/Lacag Dadweyne/Maamul"* waxaa uu macnaheedu yahay kheyraadka maaliyadeed ee Qaranka ee lagu qeexay Qaybta 4aad ee Xeerkan.

*"Kheyraad Dadweyne/Maamul"* waxaa loola jeedaa dakhliga maamulka/dowladda oo ay ka mid yihiin kuwa lagu heley deeq, waqaf, amaah, hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah, lacag deebaaji/*deposit* ah, lacago ay tahay in la helo iyo xuquuqo maqan, maalgelin iyo guud ahaan hantida noocyadeeda kala duwan.

*"Dib-u-kala-qoondeyn"* waxaa uu macnaheedu yahay qoondeeymihii oo loo kala wareejiyo hay'adaha kharash-gareynaya iyo/ama meelaha lagu kharash-gareynayo ee Miisaaniyadda Mideysan ee Sanad-maaliyadeed gaar ah.

*"Xeer-nidaamiye"* waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Wasiirka Maaliyadda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

*"Wasiir Waax ay hoos tagto"* waxaa loo jeedaa wasiir ka mas'uul ah kormeeridda waax/hay'ad ay dowladdu leedahay.

*"Xeer Qoondeyn Dheeri ah"* waxaa uu macnaheedu yahay Xeer kasta, oo hadafkiisu uu yahay in uu wax ku biiriyo qoondeymo horey loogu heley Xeer Qoondeyn Miisaaniyadeed;

"*Lacago La Kharash-gareynayo*" waa kharash-gareyn gaar ah oo lagu aqoonsadey qaybaha Miisaaniyadda Mideysan;

"*Hay'adaha Kharash-gareeya"* waxaa uu macnaheedu yahay *Hay'adaha maamulka/dowladda ee bixiya alaabo ama adeegyo guud, oo u hoos taga Wasaarad kale ama toos u hoos yimaada Wasaaradda ama Madaxweynaha oo bixiya kharashaad loogu qoondeeyey Miisaaniyadda Mideysan*;

*"Golaha Shacabka Dowlad-goboleedka"* waxaa loola jeedaa baarlamaanka dadweynaha ee Hirshabeelle ee ku qeexan Qodobka 29aad ee Dastuurka Hirshabeelle. Xeerkan dhexdiisa, ereyga Baarlamaanka ayaa sidoo kale uu macnihiisu yahay *Golaha Shacabka Dowlad-goboleedka.*

"*Wakaaladaha uu Dowlad-goboleedku Leeyahay"* waxaa loola jeedaa wakaalado ganacsi ama urur kale oo uu dhisey sharciga, oo Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ay ku leedahay saami ay ku kantarooli karto, oo soo saara alaabo ama adeegyo lagu iibiyo suuqa oo hawlgalladiisana isagu maalgeliya badanaaba isaga oo isticmaalaya dakhligiisa gaarka ah. Saami lagu kantaroolo wakaalad waxaa loola jeedaa in uu awood u leeyahay in uu adeegsado awoodahan soo socda si uu u hago siyaasadaha maaliyadeed iyo siyaasadeed ee wakaaladda si wanaagga/faa'iidada ugu badan looga dhaxlo hawlihiisaas:

a. Magacaabista ama cayrinta dhammaan, ama badi, guddiga ama maamulka gacanta ku haya hay'adda;

b. Magacaabista ama cayrinta sarkaalka fulinta ee ugu sarreeya wakaaladda;
c. Bixinta dhammaan, ama aqlabiyadda, codadka lagu dhiibto shirarka golaha/guddiga agaasimayaasha ama guddiga kale ee u dhigma ee gacanta ku haya; ama
d. Gacan ku haynta dhammaan, ama aqlabiyadda xuquuqaha cod-bixinta ee shirweynaha wakaaladdaa.

*"Xisaabta Keliya ee Dowladda/Treasury Single Account (TSA)"* waxaa uu macnaheedu yahay qaab-dhismeed mideysan oo ay u sameysan yihiin xisaabaadka banki ee dowladda ee muuqaal mideysan siinaya lacagaha kaashaka ee dowladda. Iyada oo ku saleysan mabda'a mid ahaanshaha lacagta kaashka ah iyo mid ahaanshaha khasnadda, TSA waa xisaab banki ama tiro xisaabo banki oo isku xiran oo ay dowladdu ku fuliso dhammaan lacagaha ay hesho iyo kuwa ay bixiso.

**Qaybta 4aad. Maaliyadda/Lacagta Dadweynaha iyo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan**

1. Maaliyadda/Lacagta Dadweynaha.

Xeerkan dhexdiisa, *lacag/maaliyad dadweyne* waxaa uu macnaheedu yahay:

(a) Dakhliga Dowladda, oo ay ka mid yihiin lacag ama hanti maaliyadeed oo ay hayso ama hoos yimaada Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, oo ay ka mid tahay lacag loo hayo in uu ka faa'iideysato cid aan ahayn Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya laakiin kama mid ah lacag ammaano ama loo hayo ururro aan dowli ahayn ama lacag ay heshey Wakaalad ay Dowladdu Leedahay; iyo

(b) Lacag ama hanti maaliyadeed oo ay hayso ama hoos yimaada qof u haya ama haynta lacagta wakiil uga ah Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya,

2. Kheyraadka noqonaya *lacag dadweyne* ka dib marka la helo waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna oo keliya:
   (a) Canshuuro ay soo rogtey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;
   (b) Ujuurooyinka laga qaado kuwa loo adeego oo ay soo rogto Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ama mid ka mid ah Wasaaradaheeda, hay'adeeda ama wakaaladaheeda;
   (c) Khidmo ay heshey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;
   (d) Faa'iido ama lacago kale oo ka yimid sharikaad ay leedahay *Dowladdu*;
   (e) Lacago Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ka soo galey iibka ama kireynta hanti ay leedahay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

(f) Lacago ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ka heshey shati-siinta ama iibinta xuquuq ay gacanta ku hayso Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, xuquuqaha baarista iyo soo-saarista kheyraad dabiici ah, iyo xuquuqaha lahaanshaha hanti aqoon/cilmi laga heley;

(g) Lacag ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ku heshey lahaanshaha shey (*royalties*),

(h) Ganaax, lacagaha maamulku qaado, magaha laga helo tallaabooyin madani ah oo la qaadey, iyo caymiska ay hesho Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya,

(i) Deeqo iyo hadiyado ay hesho Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

(j) Deymaha ka maqan Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

3. Si tacaamulaadka maaliyadda dadweynaha iyo hawlgallada Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya si taabogal ah oo hufan loogu maareeyo, loo xisaabiyo loona kantaroolo, waxaa halkaan lagu sameynayaa Sanduuq Maaliyadeed oo Mideysan kaas oo lagu shubayo guud ahaan dakhliga ama lacagaha kale ee Dowladdu qaaddo ama hesho.

4. Waxyaabaha ku jira Sanduuqa Maaliyadda Mideysan

Lacagaha uu helo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ama sanaadiiqda kale ee maamulka/dadweynaha waxaa loo kala saarayaa sida soo socota:

(a) Dakhli Canshuur ah, oo ay ka mid yihiin canshuuraha laga qaado macaashka iyo faa'iidada, alaabada iyo adeegyada, iyo canshuuraha laga qaado ganacsiga caalamiga ah iyo wax-is-dhaafsiga kale

(b) Dakhli aan canshuur ahayn iyo maaliyadaha gudaha ka soo baxa

(c) Deymo maqnaa oo la heley

(d) Deeqo laga helo gudaha iyo dibaddaba;

(e) Dakhli kale oo lagu heley sharci-fulin / *revenues received under an enactment*;

(f) Lacagaha kale ee la helo oo ay ka mid yihiin wax lagu heley amaah, daymo iyo lacago hor marin ahaa oo loo soo celiyey dowladda, waraaqo ballanqaad lacageed ah oo ay dowladdu iibisey, maalgelin ay dowladdu lahayd oo ay iska iibiso, hanti ama maaliyado gaar ah oo ay dowladdu iska iibiso

5. Haraaga ka soo hara dhammaan maaliyadaha maamulka/dadweynaha ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in lagu daraa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee uu kormeerayo Baarlamaanka uuna maareynayo oo fulinayana Wasiirka, marka laga reebo waxyaabaha lagu oggolaado Qaybta 28 ee Xeerkan. Wasiirku waxaa uu leeyahay awood uu ku maamulo Sanduuqa Maaliyadda

Mideysan si uu u dhaliyo in si taabogal ah oo hufan loo maamulo lacagaha caddaanka/kaashka ah.

## Madaxa II. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Dad Ka Saaran Miisaaniyadda iyo Maareynta Maaliyadda Dadweynaha

### Qaybta 5aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Madaxweynaha;

1. Madaxweynaha asigoo la tashanaya madaxweyne ku xigeenka ayaa leh mas'uuliyadda guud ee arrimaha siyaasadda ee la xiriira Miisaaniyadda Mideysan iyo hannaanka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, waxaana uu leeyahay awood uu ku qaato go'aamada iyo tallaabooyinka lagamamaarmaanka u ah ka soo bixidda mas'uuliyahadaha noocaas ah.

2. Madaxweynuhu waxaa uu Wasiirka u wakiilan karaa, mid kasta oo ka mid ah awoodaha uu xeerkan siiyey Madaxweynaha, si waafaqsan shuruudaha uu raacayo Madaxweynaha waqtiga uu awoodahaas cid u wakiilanayo. Haseyeeshee, wakiilashada noocaas ah kama koryeeleyso Madaxweynaha mas'uuliyadda uu saarayo Xeerkan.

### Qaybta 6aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Wasiirka

1. Wasiirku waxaa uu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha farsamo ee la xiriira habsami u shaqeynta hannaanka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha, si waafaqsan talooyinka uu siiyo Madaxweynaha sida ay dhigeyso Qaybta 5.1.

2. Mas'uuliyadaha gaarka ah ee Wasiirka waxaa ka mid ah soo-bandhigidda iyo fulinta Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka, diyaarinta xisaabaadka sanadlaha iyo kuwa sanadka dhexdiisa iyo warbixinnada kale ee la xiriira Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka, iyo maareynta xoolaha, hantida ma-guurtada ah, hantida maaliyadeed, oo ay ka mid yihiin dakhliga, amaahaha iyo ballanqaadyada (*guaranteed*) dowladeed, ee lagu sharxay Xeerkan.

3. Ka dib marka uu oggolaado Madaxweynaha, ayna waafaqsan tahay shuruucda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, Wasiirku waxaa uu Wasaaradda gudaheeda ka sameyn karaa qaab-dhismeedyo/unugyo hirgeliya waxyaabaha uu waajibinayo Xeerka si markaa si buuxda uu ugu guto/gudato hawlaha halkaan lagu sharxay. Faahfaahinta la xiriirta qaab-dhismeedyadaas/unugyadaas waxaa lagu sharxi doonnaa **xeer-nidaamiyeyaal** waafaqsan Xeerkan.

4. Awoodda iyo mas'uuliyadda si gaar ah Wasiirka loogu siiyey Xeerkan gudahiisa waxaa loo wakiilan karaa ku-xigeenno ama saraakiil sare oo Wasaaradda ka tirsan oo hawshan loo xushey. Haseyeeshee mas'uuliyad kasta si waafaqsan qayb-hoosaaddan cid kale loogu wakiisho, Wasiirka kama qaadeyso mas'uuliyadda guud ee uu saarayo Xeerkan.

**Qaybta 7aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadda Soo Saarista Xeer-nidaamiyeyaal iyo Amarro**

1. Wasiirku waa in uu diyaariyaa uuna soo saaraa **xeer-nidaamiyeyaal**, meelaha uu waajibineyo Xeerkan, si loo hirgeliyo qoddobada ku jira Xeerkan. Wasiirku waxaa uu soo saari karaa **xeer-nidaamiyeyaal iyo amarro**, marka loo baahdo, si ay u sii faahfaahiyaan mas'uuliyad gaar ah iyo hawlaha la xiriira hirgelinta Xeerkan. ***Xeer-nidaamiyeyaasha*** uu soo saaro Wasiirka isaga oo raacaya Xeerkan, waa in Baarlamaanku dib-u-eegis ku sameeyaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo ka bilaabma taariikhda uu Wasiirka Maaliyaddu hor geeyo Baarlamaanka. Haddii uusan Baarlamaanku 10 maalmood kaga soo saarin diidmo rasmi ah, **xeer-nidaamiyeyaashu** waxaa ay toos u noqonayaan amarro sharci ah.

**CUTUBKA B QODOBBO HOREY KA DHAQANGELAYA**

**Madaxa III. Diyaarinta iyo Ansaxinta Miisaaniyadda**

**Qaybta 8aad. Xaaladda iyo Qaabka Miisaaniyadda**

1. Wasiirku waa in uu kormeeraa diyaarinta Miisaaniyadda Mideysan isaga oo ka eegayo dhinaca qaab-maaliyadeed oo muddada dhexe ah iyada oo hadafka laga leeyahay uu yahay xaqiijinta ujeeddooyinka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ee muddo sanado ah. Qaabka-maaliyadeed ee Miisaaniyadda Mideysan waa in uu ku saleysnaadaa qiyaasaha sanad-maaliyadeedka iyo labada sano ee xiga, kuwaas oo ku xisaabtamaya siyaasadaha dhaqaale iyo horumar ee la jaanqaadi kara ujeeddooyinka dhaqaale iyo maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ku dhawaaqdey in ay ugu talo-gashey muddada dhexe.

2. Dhammaan wax-is-dhaafsiyada maaliyadeed, dakhli iyo kharashaadba, waa in la qaabeeyaa lana kala soocaa iyada oo la adeegsanayo isla kala-sooca (baadi-sooca) loo adeegsano miisaaniyadda iyo xisaabaadkaba. Xeerarkan soo socda ayaana hagaya:

    (a) Marka ay ku habboon tahay, kala-soocidahan waa in loo qaabeeyaa qaab ay ula jaanqaadi karaan jaangooyooyinka caalamiga ah ee la-isla oggol yahay ee ay qeexeen **xeer-nidaamiyeyaasha** la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Xeerkan. Miisaaniyadda mideysan ama qoondeymaha dheeriga ah, kala-

soocidda (baadi-soocyada) miisaaniyadda waxaa loo sameyn karaa kharashaadka sirta ah. Faahfaahinta kharash-gareynta noocaas ah waxaa lagu faafin doonaa ***xeer-nidaamiyeyaasha*** la socda Xeerkan.

(b) Wasiirku waa in uu qaataa mas'uuliyadda sameynta iyo siinta kala-soocidda miisaaniyadda waxaana intaa u sii dheer in uu soo saaro tilmaan-bixinno faahfaahsan oo ku saabsan sida loo adeegsanayo kala-soocidda (baadi-sooca) marka la diyaarinayo iyo marka la fulinayo labadabba iyo xisaabaadka miisaaniyadda, iyo ka dib marka uu hubiyo in qodobbo dad ku filan loo sameeyo in la hirgeliyo.

(c) Marka kala-soocidda (baadi-sooca) lagu sameeyo wax-ka-beddel laga yaabo in uu beddelo soo bandhigidda qoraallada loo diro Baarlamaanka, Wasiirku waa in uu ogeysiis hore ka bixiyaa wax-ka-beddelka noocaas ah ugu yaraan hal bil ka hor gudbinta Miisaaniyadda Mideysan. Wasiirku waa in uu hubiyaa in Baarlamaanka, sidoo kalena Hantidhowrka Guud ayaa faahfaahin buuxda laga siinayaa kala-soocidda (baadi-sooca) cusub iyo waxyaabaha ka dhalan kara kala-soocidda noocaan ah.

(d) Kala-sooca (baadi-sooca) waa in ay ku jiraan, laakiin aaney ku koobneyn waxyaabahan soo socda:

i. Dakhliga iyo kheyraadka kale oo loo qaabeeyey mowduucyo/madaxdyo waaweyn kuwaas oo faahfaahintooda lagu sii qeexi doono ***xeer-nidaamiyeyaal*** la faafiyey iyada oo la raacayo Xeerkan.

ii. Kharashaadka iyo lacagaha kale ee la bixiyo waxaa loo kala soocayaa iyada oo lagu saleynayo unugga maamul/hay'adeed ee mas'uulka ka ah bixintiisa, iyada oo loo qoondeynaya heerka hay'adda kharash-gareyneysa, waxaana loo sii kala sooci doonaa si waafaqsan kala-soocidda dhaqaale iyo kala-soocidda kale ee ay qeexi doonaan ***xeerarka*** hoos imaanaya Xeerkan.

## Qaybta 9aad. Wadar u xisaabinta iyo Xadka ay Gaareyso Miisaaniyadda

1. Miisaaniyadda Mideysan waxaa ay ka koobnaaneysaa dhammaan dakhliyada iyo kharshaadka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, iyaga oo wadar ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin lacagaha nooca ay doonaan ha ahaadeen ee laga soo wareejiyo Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka, dowladaha kale, hay'adaha iyo sanduuqyada madax-bannaanida hoose haysta, ganacsiyada maamulka ama kuwa gaarka loo leeyahay ama hay'adaha maaliyadda, hay'adaha aan dowliga ahayn, ama shakhsiyaadka caadiga ah.

2. Miisaaniyadda Dowlad-goboleedku waa in ay, ilaa xadka la heli karo xog la isku halleyn karo, lagu daraa dhammaan maaliyadaha deeq-bixiyeyaashu si toos ah ugu taageeraan Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, taageerada guud ee miisaaniyadda, maaliyadaha la siiyo qaybaha kala duwan (*basket funding of sectors*), iyo maaliyadaha mashaariicda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

3. Miisaaniyadda Mideysan waxaa ay ahaaneysaa miisaaniyad mideysan oo mid keliya ah oo ay ku wada jiraan kharashaadka joogtada ah iyo kuwa hantida labadaba.

**Qaybta 10aad. Saa'id-Naaquska Miisaaniyadeed**

1. Miisaaniyadda Mideysan waa in ay muujisaa wixii miisaaniyadda saa'id ama naaqis ka ah, taas oo ah farqiqa u dhexeeya wadarta dakhliga oo aaney ku jirin amaahaha cusub iyo wadarta kharashaadka. Miisaaniyadda Mideysan waa in ay sheegtaa hadafka lacagta saa'idka ah ee miisaaniyadda loo isticmaalayo, iyo, haddii ay miisaaniyaddu naaqis leedahay sida maaliyad loogu helayo, waxaana ay u baahaneysaa in uu Baarlamaanku ansixiyo.

**Qaybta 11aad. Meertada iyo Kalandarka Miisaaniyad-diyaarinta**

1. Wasiirku waa in uu Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah oo ay la socdaan dokumentiyo uu u gudbiyaa Baarlamaanka ugu yaraan 2 bilood ka hor marka uu bilaabanayo sanad-miisaaniyadeedka.

2. Miisaaniyadda Mideysan waa in loo diyaariyaa si waafaqsan geeddi-socodka iyo jadwalka waqti ee loogu dejiyey Qaybta 11.1 ee kore, taas oo ay taageeri doonto meerto faahfaahsan oo lagu sheegey wareegto la faafiyey oo ku saabsan miisaaniyad-saneedda oo ku jirta ***xeer-nidaamiyeyaasha*** la socda Xeerkan.

3. Meertadan miisaaniyad-diyaarinta waa in ay ka koobnaataa laba weji, wejiga hore oo xoogga saaraya waraaq ku saabsan qaabka guud ee loo diyaarinayo miisaaniyad iyo wareegga miisaaniyadda, iyada oo midka labaadna uu xoogga saarayo diyaarinta miisaaniyad-sanadeedda faahfaahsan oo taageereysa siyaasadaha iyo mudnaanaha lagu sheegey waraaqda qaabka guud ee miisaaniyadda.

**Qaybta 12aad. Dokumentiyada iyo Waxyaabaha ku jira Miisaaniyadda La Soo Jeedinayo**

1. Miisaaniyadda la soo jeediyey ee uu Wasiirka u soo bandhigo Baarlamaanka waa in ay ka mid ahaadaan dokumentiyadan soo socda:

(a) Waraaq ka hadleysa qaabka guud ee miisaaniyadda.

(b) Qiyaasaha faahfaahsan ee miisaaniyad-sanadeedda oo la barbardhigey wixii ka soo baxay sanad-miisaaniyadeedkii hore, miisaaniyadda asalka ah ee sanadka lagu jiro iyo sidoo kale wixii dhab ahaan ka soo baxay miisaaniyaddaa ee ay muujineyso xogta markaa la hayo, iyo waxyaabaha la filayo in ay ka soo baxaan miisaaniyadda sanadkaa. Faahfaahinta iyo waxyaabaha ku jira qiyaasaha miisaaniyad-sanadeedda waa in lagu qeexaa ***xeer-nidaamiye*** uu soo saarayo Wasiirka ee hoos tegeya Xeerkan.

(c) Qoraal sharci ah oo ay u fiirsadaan Baarlamaanka, kaas oo dhigaya is-beddelka (is-beddellada) siyaasadaha dakhliga canshuurta ah iyo kan aan canshuurta ahayn, kaas oo ay tahay in la soo bandhigo ugu dambeyn maalinta qiyaasaha miisaaniyadda loo gudbinayo Baarlamaanka.

(d) Lifaaq qaab kooban ay ugu qoran yihiin dhammaan deeq-bixiyeyaasha maaliyadda siinaya, oo kala saaraya maaliyad-siinta lagu taageeraya Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo maaliyad-siinta kale ee dibadeed. Qaabab u gaar ah oo loo diyaariyo macluumaadka noocaas ah ayaa lagu tilmaami doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** uu Wasiirku soo saaro oo hoos taga Xeerkan.

2. Marka laga soo tago Qaybta 12.1.c ee kore, wixii kale ee Xeer (xeerar), siyaasado iyo tallaabooyin la soo jeedinayo ah oo sheegaya is-beddello lagu sameeyo siyaasadaha dakhliga canshuuraha iyo kan aan canshuuraha ahayn waxaa waqti kasta la hor geyn karaa Baarlamaanka si ay u tixgeliyaan.

3. Miisaaniyadda La Soo Jeedinayo waa in ay la socotaa farriinta Madaxweynaha ee miisaaniyadda.

**Qaybta 13aad. Lafagurista Saameynta Maaliyadeed ee uu Keeni Karo Sharci-qabyo ah.**

1. Dhammaan hindise-sharciyeedyada loo gudbiyo Baarlamaanka si uu u ansaxiyo waa in ay la socotaa lafguris ku saabsan saameynta maaliyadeed ee ka dhalan karta, taas oo sheegeysa saameynta la qiyaasey in ay ku yeeshaan dakhliga iyo kharashaadka ee sanad-maaliyadeedka uu sharcigaa dhaqangeliyo, iyo sidoo kale saameynta maaliyadeed ee sharcigu ku yeelanayo qorshayaasha iyo miisaaniyadaha sanadaha dambe.

2. Wasiirku waa in uu diyaariyaa ***tilmaamo (amarro)*** la xiriira nooca lafagurista ay tahay in la sameeyo iyo geeddi-socodka lagu ogaanayo saameynta maaliyadeed.

3. Wasiirku waa in uu Baarlamaanka siiyaa fikirkiisa ku aaddan lafagurista lagu sameeyey saameynta maaliyadeed.

**Qaybta 14aad: Qoondeynta Ku-talogalka ah/Waxyaabaha Soo Kordha**

1. Miisaaniyadda Mideysan dhexdeeda, Baarlamaanku waa in uu ansaxiyaa qiyaas lacag maaliyadda maamulka/dadweynaha ah oo aan ka badneyn shan boqolkiiba wadarta dakhli-sanadeedka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, ee qiyaasaha Miisaaniyadda La Soo Jeediyey ah si ay u noqoto Maaliyad Loogu Talogaley Waxyaabaha Soo Kordha (Qoondeyn Ku-talogal ah).

2. Qoondeynta Ku-talogalka ah waxaa loo adeegsan karaa kharashaadka degdegga ah ee aan la sii saadaalin ee ka dhalanaya xaalado degdeg ah oo aan lacag-bixintooda la dib-dhigi karin ilaa laga oggolaado miisaaniyad dheeri ah ama Miisaaniyadda Mideysan ee sanadka soo socda iyada oo aan saameyn culus arrinta ku yeelan dadweynaha. Si loo sii caddeeyo, "degdegga ah ee aan la sii saadaalin" waxaa loo qeexay si gaar ah oo ay soo hoosgelayaan aafooyinka dabiiciga ah, cudurrada dillaaca iyo dhacdo kasta ee ay tibaaxdey ku dhawaaqista Xaalad Degdeg ah oo qaran sida uu dhigayo Qodobka 131aad ee Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah.

3. Wasiirku waa in uu Golaha Wasiirrada u gudbiyaa, si uu u ansaxiyo, dhammaan soo-jeedimaha ku aaddan sida wax looga isticmaalayo Maaliyadda/Qoondeynta Ku-talogalka ah, iyada oo ay weheliso qiil-u-sameyn faahfaahsan (oo waafaqsan dhabbe-tuseyaasha ku jira qaybta 14.2 ee kore) iyo tirada lacagta la codsanayo. Haddii Golaha Wasiirradu ay ku qancaan in ay jirto baahi degdeg ah oo aan la sii saadaalin oo loo qabo bixinta kharashaadka (sida ku qeexan Qaybta 14.2 ee kore), oo qoondo aan loo sameyn ama qoondo ku filan aan loogu sameyn Xeerka Qoondeynta ama Xeer Qoondeyn oo Dheeri ah, waxaa uu ansaxin karaa in Lacag Horumarin ah laga siiyo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan si loogu buuxiyo baahidaas.

4. Maaliyadda laga isticmaalo Qoondeynta Ku-talogalka ah waa in Wasiirku uu ku daraa warbixinta saddex-biloodlaha ah ee waxyaabaha is-beddela ee ka hadleysa bisha (bilaha) kharashkaas la galey ee uu u dirayo Baarlamaanka.

**Qaybta 15aad. Helidda Dadweynaha ee Miisaaniyadda**

1. Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah waxaa ay noqoneysaa mid ay heli karaan dadweynaha waxyar ka dib marka loo gudbiyo Baarlamaanka.

2. Miisaaniyadda La-ansaxiyey waxaa sidoo kale ay dadweynuhu heli karaan waxyar ka dib marka la ansaxiyo.

**Qaybta 16aad. Awoodda iyo Mas'uuliyadda Baarlamaanku Ku Leeyahay Ansaxinta Miisaaniyadda**

1. Dib-u-eegista iyo ansaxinta uu Baarlamaanku ku sameynayo Miisaaniyadda La Soo Jeediyey waa in loo sameeyaa si waafaqsan xeerarka iyo habraacyada ay go'aamisey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

2. Wareegtada Qoondeymaha Sanadlaha ah waa in la qaataa hal sanad-maaliyadeed waana in ay dhacdaa dhammaadka sanad-maaliyadeedka uu Baarlamaank u ansaxiyey.

**Qaybta 17aad. Wax-ka-beddel ay Sharci-dejintu ku Sameyso Miisaaniyadda La Soo Jeediyey**

1. Marka uu dib-u-eegeyo Miisaaniyadda La Soo Jeediyey ee uu soo gudbiyey Wasiirku, Baarlamaanku waxaa uu, isaga oo kala xiriiraya Wasiirka, sameyn karaa wax-ka-beddel, isaga oo sharaxaad ka bixinaya wax-ka-beddel kasta oo uu soo jeediyo, taas oo tilmaameysa sida wax-ka-beddelladaasi loogu sameynayo qiyaasaha faahfaahsan, iyada oo tilmaameysana sida wax-ka-beddellada la soo jeedinayo ay u yihiin kuwo waafaqsan ujeeddooyinkii maaliyadeed iyo kuwii horumarineed ee la sheegey in ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya leedahay, isaga oo hubinayana Miisaaniyaddu ay sii ahaato mid dhab ahaan ka tarjumeysa hufnaanta qoondeynta.

**Qaybta 18aad. Maaliyadsiin Ku-meelgaar ah iyo Qaadashada/dhaqangelinta Miisaaniyadda**

1. Haddii ay dhacdo in Baarlamaanku uu ansaxin waayo Miisaaniyadda Mideysan ka hor inta aanu bilaaban sanad-maaliyadeedka, Wasiirka waxaa uu awood u leeyahay in uu dakhli ururiyo in uu ansaxiyo kharash-gareyn, waafaqsan sida ay ku hamiyeyso miisaaniyadda la soo jeediyey, ilaa laba iyo toban-meelood meel (1/12) Miisaaniyaddii ugu dambeysey ee la ansaxiyey sanad-maaliyadeedkii hore bil walba oo sanadka ka mid ah.

**Qaybta 19aad. Miisaaniyado Dheeri ah iyo Dib-u-eegista Bartamaha Sanadka**

1. Sanad-miisaaniyadeedka dhexdiisa, Miisaaniyadda La-ansaxiyey ayaa wax ka-beddel lagu sameyn karaa iyada oo loo marayo miisaaniyadaha dheeriga ah kuwaas oo u baahan ansaxinta Baarlamaanka.

2. Diyaarinta, ansaxinta iyo fulinta miisaaniyad dheeri ah waxaa hagaya isla xeerarkii hagayey ansaxinta iyo fulinta Miisaaniyadda Mideysan ee uu sheegay Xeerkan.

3. Wasiirku waa in uu Baarlamaanka u gudbiyaa dib-u-eegis bartamaha sanadka lagu sameeyo hirgelinta Miisaaniyadda taas oo la sameynayo bartamaha bisha Luuliyo ee sanad kasta, dib-u-eegistaas oo ay ka mid tahay lafaguris lagu sameeyo habsamida loo wado dakhli-ururinta iyo kharash-bixinta lixda bilood ee hore ee sanad-maaliyadeedka, haddii ay lagamamaarmaan noqotana, in la soo jeediyo miisaaniyad dheeri ah si looga ansaxiyo Baarlamaanka.

4. Si loo hubiyo in Baarlamaanku aanu isku waqti u helin laba miisaaniyadood oo kala duwan si uu u ansaxiyo, Wasiirku waa in uu hubiyaa in, haddii loo baahdo, dhammaan Miisaaniyadaha Dheeriga ah loo wada gudbiyo Baarlamaanka ugu dambeyn 15ka Luuliyo ee sanad-maaliyadeedka Maaliyadda Dheeriga ah ay la halmaasho. Baarlamaanku waa in ay Miisaaniyadahaa Dheeriga ah ansaxiyaa ugu dambeyn 31ka Agoosto ee sanad kasta.

## Madaxa IV. Fulinta Miisaaniyadda

### Qaybta 20aad. Mas'uuliyadaha La Xiriira Fulinta Miisaaniyadda Mideysan

1. Wasiirku ayaa ka mas'uul ah maareynta guud ee fulinta Miisaaniyadda Mideysan iyo miisaaniyadaheeda dheeriga ah. Ka dib marka Miisaaniyadda Sanadka uu ansaxiyo Baarlamaanka, Wasiirku waa in uu wasiirrada iyo madaxda hay'adaha kharash-gareynta ogeysiiyaa qiyaasaha la ansaxiyey ee iyaga loo qoondeeyey.

2. Wasiirku waxaa uu mas'uuliyadda mid ka mid ah ama dhammaan hawlaha la xiriira fulinta miisaaniyadda u dhiibi karaa ku-xigeennadiisa iyo/ama saraakiil loo xushey hawlahaas oo ka tirsan Wasaaradda. Mas'uuliyad u dhiibashada noocaas ah waa in ay waafaqsanaataa shuruucda kale ee qeexaya awoodda ku-xigeennada iyo saraakiisha kale ee sharciga ah ee dowladda. Mas'uuliyadahan cid loo wakiishey oo lagu qeexi doono ***waraaqda mas'uuliyad u wakiilashada*** ee la soo saarayo iyada oo la raacayo Xeerkan. Haseyeeshee tani Wasiirka kama qaadeyso mas'uuliyadda guud ee uu saareyo Xeerkan. Waraaqda mas'uuliyad cid u wakiilashada waxaa ay la mid tahay sida **amarrada la soo saaro,** sida uu qeexayo Xeerkan.

3. Wasiirrada mid kasta oo ka mid ah Wasaaradaha kale ee kharash-gareynaya miisaaniyadda, iyo madaxda kale ee hay'adaha miisaaniyadda leh oo si goonidood ah loogu aqoonsadey Xeerka Qoondeymaha Sanadlaha ah, ayaa mas'uul ka ah in si habboon oo hufan ay u fuliyaan miisaaniyaddooda si waafaqsan Xeerkan, ***xeer-nidaamiyeyaasha*** la soo saarey ee ka hoos shaqeeya, iyo tilmaamaha iyo dhabbe-tuseyaasha uu soo saaro Wasiirka. Intaa waxaa dheer in si buuxda ay Madaxweynaha

iyo Baarlamaanku ugula xisaabtamayaan sida ay uga soo baxaan hawshooda ku aaddan hirgelinta miisaaniyadahooda.

4. Wasiirrada iyo madaxda hay'adaha miisaaniyadda leh waxaa ay mas'uuliyadaha fulinta miisaaniyadda u wakiilan karaan saraakiil loo xushey oo ka tirsan wasaaraddooda/hay'addooda, si waafaqsan qodobbada qayb-hoosaadda (faqradda) 2aad ee kore. Wakiilashada noocaan ah, oo ay hagayso **waraaqda mas'uuliyad u wakiilashada** la soo saaro ee hoos tegaya Xeerkan, wasiirka/madaxda hay'adda kama qaadayaan mas'uuliyadda uu saareyo Xeerkan.

**Qaybta 21aad. Marxaladaha Fulinta Miisaaniyadda**

Si uu wax ugu kordhiyo ***xeer-nidaamiyeyaasha*** lagu soo saarey Xeerkan, Wasiirku waa in uu soo saaraa **amarro (tilmaamo)** la xiriira marxaladaha kala duwan ee fulinta miisaaniyadda, kuwaas oo ay ku jiraan ee laakiin aan ku koobneyn, qoondeymaha iyo ballanqaadyada. Geeddi-socodyada wax-soo-iibsiga, oo ay ku jiraan wax soo gadashada iyo lacag-bixinta waa in ay waafaqsanaadaan **Xeer-nidaamiyeyaasha** Wax-soo-iibsiga Maamulka wax-ka-beddelkeedii ugu dambeeyey.

**Qaybta 22aad. Xeerarka Guud ee La Xiriira Fulinta Miisaaniyadda**

1. Xeerarka la xiriira fulinta miisaaniyadda waxaa si faahfaahsan loogu sheegi doonaa ***xeer-hoosaadyo*** laga soo saaro Xeerkan, waxaana sii kala dhig-dhigi doona tilmaamo iyo dhabbe-tuseyaal muddo ka dibba uu soo saarayo Wasiirka.

2. Kantaroolidda guud ee fulinta Miisaaniyadda Mideysan waxaa loo marayaa hirgelinta xeerarkan guud ee soo socda, oo lagu saleynayo dhammaan wax-is-dhaafsiyada/lacag-bixinta:

   (a) Wadarta guud ee qoondeymaha ee qoondeyn qayb/xariiq gaar ah ee hal sanad-maaliyadeed kama badan karto lacagta arrinta/xariiqdaa gaarka ah loogu qoondeeyey Xeerka Qoondeymaha Sanadlaha ah, ee hadba wax lagaga beddelo dib-u-kala-qondeynta miisaaniyadda ee la sameeyo iyada oo la raacayo qaybta 26aad iyo/ama Xeerarka Qoondeeymaha Dheeriga ah;

   (b) Xakameynta qoondeymaha wadarta guud ee lagu sheegey qaybta (a), wadarta qoomeymaha ee qayb/xarriiq miisaaniyadeed gaar ah oo faahfaahsan ee sanad-miisaaniyadeed gaar ah waa in aaney ka badan tirada lacagta qaybta/xarriiqdaa loogu qoondeeyey qiyaasaha faahfaahsan ee miisaaniyad-sanadeedda, oo hadba wax lagaga beddelo dib-u-kala-qoondeyn iyo/ama miisaaniyado dheeri ah;

(c) Wadarta lacagaha la bixiyo ee qayb/xarriiq miisaaniyadeed oo faahfaahsan ee sanad-maaliyadeed waa in aaney ka badan qoomeymaha loo soo saarey si waafaqsan qaybta (b) ee qaybtaa/xariiqdaa miisaaniyadeed.

3. Lacagaha lagu bixiyo amaahda horey loo qaatey waa in si dad ku filan loogu daraa Miisaaniyadda Mideysan iyo Miisaaniyadaha Dheeriga ah ee ka farcama. Wasiirku waa in uu hubiyaa in lacagaha lagu bixiyo amaahda horey loo qaatey ay ahaadaan kuwa mudnaanta koowaad la siiyo marka la fulinayo Miisaaniyadda Mideysan. Faahfaahin la xiriirta habraacyada loo maro fulinta miisaaniyadda ee la xiriira lacagaha lagu bixiyo amaahda horey loo qaatey waxaa lagu sii faahfaahin doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** hoos-yimaada Xeerkan.

4. Marka laga reebo hawlgallada sida ku-meelgaarka ah loogu kala maareynayo (wareejinayo) lacagta lagu hayo khasnadda, iyo si waafaqsan xeerarkan guud, waa in aan lacag laga bixin Sanduuqa Maaliyadda Mideysan marka laga reebo shey lagu aqoonsadey qiyaasaha miisaaniyad-sanadeedd, oo hadba wax looga beddelo lacago miisaaniyadda loo kala wareejiyo iyo/ama Xeer Kala-qoondeyn oo Dheeri ah.

**Qaybta 23aad. Qorsheyaasha Sanadlaha ah ee Dakhliga iyo Kharash-gareynta**

1. Dakhli-ururinta iyo kharash-gareynta sanadka dhexdiisa waa in ay sal u noqdaan in qorsheyaasha sanadlaha ah loo diyaariyo habkii iyo qaabkii ay u sheegeen ***xeer-nidaamiyeyaasha*** ka dhasha Xeerkan.

2. Wasiirku, muddo soddon (30) maalmood gudahooda ah ka dib marka Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah loo gudbiyo Baarlamaanka, waa in uu ka dalbadaa dhammaan wasaaradaha iyo madaxda Hay'adaha Kharash-gareynta, in ay diyaariyaan ayna Wasaaradda u soo gudbiyaan, qorsheyaal sanadle ah oo kharash-gareyn iyo waqtiyada ay dakhliyada soo gelayaan (haddii hay'addu ay tahay mid dakhli uu soo galo) oo loo kala jejebiyey bil-bil (bil kasta), kuwaas oo dib loogu noqon karo;

3. Ka dib marka uu Baarlamaanku ansaxiyo Miisaaniyad-Sanadeedda, Wasiirku waa in uu:

(a) Marka wasaaradda, hay'adda ama wakaaladda ay mas'uul ka yihiin dakhli-ururin, ka dalbado in ay diyaariyaan qorshe-sanadeed dakhli ururin oo loo kala jejebiyey bil-bil (bil kasta);

(b) Diyaariyaa qorshe-sanadeed, loo kala jejebiy bil-bil (bil kasta) oo ku saabsan ururinta canshuuraha, kastamada, iyo dakhliga aan canshuurta ahayn, iyo

sidoo kale kheyraad kale oo miisaaniyadeed oo la qaatey, oo ay ku jiraan haraaga loogu tegey sanduuqa maaliyadda mideysan, deeqo-dabadeed iyo amaaho gudaha iyo dibaddaba laga helo,

(c) Diyaariyo qorshe-sanadeed lagu bixinayo amaahaha, oo loo kala jejebiyey bil-bil;

(d) Iskubiiriyaa oo uu dib u eegaa qorsheyaasha, oo uu wax ka beddelka loo baahan yahay ku sameeyaa, isaga oo la tashanaya kuwa ay khuseyso, si loo hubiyo in dhammaan lacagaha la isaga baahan yahay la bixiyo waqtigii la rabey inta lagu jiro sanad-maaliyadeedka;

(e) Ansaxiyo uuna soo saaro qorsheyaasha kharash-gareynta; iyo

(f) U diyaaariyo una u soo saaro qoondeymaha si waafaqsan qorsheyaashii lagu heshiiyey.

4. Guud ahaan kharash-gareyntu waa in ay waafaqsanaataa qorsheyaashii kharash-gareynta ee uu ansaxiyey Wasiirka. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo qorsheyaashan waa in Wasiirka lagu ogeysiiyaa muddo aan ka yareyn toddoba (7) maalmood oo la shaqeeyo ka horr bisha qorshaha qarash-gareyntu uu la xiriiro.

5. Marka laga soo tago sida ay dhigeyso Qaybta 23.3, qorsheyaashu waa in ay bil kasta dib u eegaan wasaaradaha, hay'adaha iyo wakaaladaha oo wixii is-beddel ahna ay ku soo ogeysiiyaan Wasiirka iyaga oo ka codsanaya in uu ansaxiyo/oggolaado qorsheyaasha dib loo eegey.

## Qaybta 24aad. Qandaraasyada iyo Wax-soo-iibsiga

1. Dhammaan alaabada iyo adeegyada laga soo iibsanayo kuwa bixiya, oo ay ku jiraan maalgelimaha hantida, waa in ay waafaqsanaadaan qodobbada uu dhigeyo Xeernidaamiyeyaal soo bixidoona.

2. Dhammaan qandaraasyada, oo ay ku jiraan kuwa lagu galey iyaga oo ah habka la fududeeyey ee Dalabaadka Wax-ka-soo-iibsiga Degaanka, waa in loo tixgeliyaa ballanqaad ay gashey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

3. Marka laga soo tago qodobbada ku jira Xeerka Wax-soo-iibsiga Maamulka/Dowladda, qandaraasyada wax-soo-iibsiga ee sanadaha badan socda waxaa hagaya lacagta sanad kasta loo qoondeeyey ee ku jirta qaybta/xariiqda miisaaniyadda ee u habboon ee ka mid ah Miisaaniyadda Mideysan, oo hadba wax looga beddelo lacag u kala wareejinta miisaaniyadda iyo/ama miisaaniyad dheeri ah. Lama qaadi karo wax tallaabo ah oo

lagu burinayo qandaraasyada sanadaha badan socda. Xaddiga lacagta qandaraasyada ee ay tahay in la bixiyo sanadaha soo socda waxaa shardi u ah in la geliyo Miisaaniyadda Mideysan ee sanadkaa. Qodobbada ka hadlaya qandaraasyada sanadaha badan socda waxaa loo qori doonaa qaab muujinaya xaddidaadahan.

4. Dhammaan qandaraasyada aan ka badneyn qiyaasta loogu talogaley ee lagu sheegey ***xeer -nidaamiyeyaasha*** ku jira Xeerka Wax-soo-iibsiga Maamulka/Dowladda iyo wax-ka-beddelka ilaa haatan lagu sameeyey, waxaa dib-u-eegaya oo ansaxinaysa hay'adda Dowladda ee u xilsaaran arrimaha sharuucda Dowladda ama cidda ay u wakiilatey. Wasiirrada iyo madaxda hay'adaha iyo wakaaladaha miisaaniyadda waa in ay qaadaan mas'uuliyadda ah in ay hayaan diiwaan waqtiga la socda oo qoraya qandaraasyada la galey iyo in ay hubiyaan in qandaraasyada sanadaha badan socda ay si buuxda uga muuqdaan qiyaasaha miisaaniyadda ee Baarlamaanku u ansaxiyey sanadaha ay u baahanayaan maaliyad-siin.

5. Dhammaan qandaraasyada waa in sida ugu dhow ee suuragalka ah loogu muujiyaa qorshe-sanadkeedka wax-soo-iibsiga ee wasaaradda, hay'adda ama wakaaladda ay khuseyo, sida ay waajibinayso Xeerka Wax-soo-iibsiga Maamulka/Dowladda. Qorsheyaasha wax-soo-iibsiga ee lagu soo iibsanayo alaabada iyo adeegyada kala duwan waa in loo diyaariyaa hab waafaqsan noocyada kala duwan ee kharashaadka ee ku jira Sharciga Miisaaniyadda, waana in loo gudbiyaa Wasiirka iyaga oo ah caddeyn taageereysa qorsheyaashooda kharash-gareynta.

## Qaybta 25aad. Kantaroolidda/Xakameynta Ballanqaadyada

1. Guud ahaan kharashaadka la bixiyo waa in loo maraa habraacyada kantaroolidda/xakameynta ballanqaadyada ee ay dhigayaan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** hoos taga Xeerkan.

2. Haddii si gaar ah loogu sheego ***xeer-nidaamiyeyaasha*** hoos taga Xeerkan ma ahee, dhammaan ballanqaadyada waa in oggolaansho looga helaa Wasiirka ama cidda uu Wasiirku u wakiisho.
3. Dhammaan ballanqaadyada oggolaanshaha loo heley waxaa ay bixintoodu ku xiran tahay in la hayo lacago la qoondeeyey oo aan cid loo ballanqaadin oo ku jira qaybta/xarriiqda (xariiqaha) miisaaniyadda ee lacagta la ballanqaadayo la doonayo in laga helo.

**Qaybta 26aad. Dib-u-kala qoondeynta Miisaaniyadda Mideysan**

1. Ka dib marka la qaato/ansaxiyo Miisaaniyadda Mideysan, dhammaan lacagaha loo kala wareejinayo miisaaniyadda dhexdeeda waa in loo sameeyaa si waafaqsan Xeerka Miisaaniyadda.

2. Dib-u-kala qoondeynta guud ee miisaaniyadda waa in warbixintooda ay ku soo baxdaa warbixinta natiijooyinka maaliyadeed ee saddex-biloodlaha ah ee uu diyaariyo Wasiirka.

**Qaybta 27aad. Qoondeymaha oo Waqtigoodu Dhaco Dhammaadka Sanad-Maaliyadeedka**

1. Dhammaan qoondeymaha aan la bixin iyo dhammaan qoondemaha aan cid loo ballanqaadin waxaa uu waqtigoodu dhacayaa dhammaadka sanad-maaliyadeedka.

2. Dhammaan lacagaha ka soo hara qoondeymaha la ballanqaadey ee aan la bixin ka hor intii uusan dhammaan sanad-maaliyadeedka, waa in la bixiyaa iyada oo la adeegsanayo qoondeynta sanad-maaliyadeedka ku xiga. Waa mamnuuc in lacagihii ka soo harey ballanqaadkii sanadki hore lagu darsado sanadka xiga. Diiwaangelinta, xisaabinta iyo ka-warbixinta lacagahaa soo horey ee aan la bixin waa in lagu sheegaa **xeer-nidaamiyeyaasha xisaabaadka** ee lagu soo saari doono Xeerkan waana in ay waafaqsanaadaan qodobbada qaybaha 30, 31 iyo 32 ee Xeerkan.

**Madaxa VI. Maareynta Lacagaha Caddaanka ah iyo La-Tacaamulka Bankiga**

**Qaybta 28aad. Maareynta Lacagaha Caddaanka/kaashka ah**

1. Wasiirka ayaa mas'uul ka ah hubinta in dhammaan lacagaha caddaanka ah ee dowladda loo isticmaalo si caqligal ah, hufan oo aan kharash badan ku bixin.

2. Wasiirku waa in uu hubiyaa in lacagaha caddaanka ah la diyaariyo waqtigii loo baahnaa si loogu bixiyo dhammaan lacagaha bixintoodu si sax ah loo oggolaadey ee ka dhalanaya fulinta Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

3. ***Xeer-nidaamiyeyaal*** hoos taga Xeerkan ayaa la soo saari doonaa si ay u waajibiyaan nidaam hufan oo loo maareeyo lacagta caddaanka ah ee dowladda kuwaas oo lagu doonayo in lagu xaqiijiyo ujeeddooyinka lagu sheegey Qaybta 28.1 iyo Qaybta 28.2. ***Xeer-nidaamiyeyaasha*** iyada oo ay arrimo kalena ka hadli doonaan waa in ay:

(a) Awood u siiyaan Wasiirka in uu dhammaan kuwa isticmaalaya miisaaniyadda ka helo macluumaadka uu Wasiirku ugu baahan yahay in si habsami ah uu u shaqeeyo hannaanka maareynta lacagta caddaanka ah;

(b) Wasiirka ku waajibiyaan in uu dhiso qaababka hay'adeed iyo maamul ee loogu baahan yahay ka shaqeysiinta hannaanka maareynta lacagaha caddaanka ah ee Wasaaradda dhexdeeeda;

(c) Xaq u siiyaan Wasiirka in uu helo macluumaad ku saabsan dhammaan xisaabaha banki ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

**Qaybta 29aad. La-tacaamulka Bankiyada**

1. Qaababka la-tacaamulka bankiyada ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in intii suuragal ah raacaan mabaa'diida Xisaab Mideysan oo ay Khasnaddu leedahay, oo dhammaan xisaabaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya caadi ahaan loo maareeyo sidii in ay hal xisaab oo keliya yihiin marka laga eegayo dhinaca lacagaha caddaanka ah.

2. Waa in aan xisaab banki oo ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ku leedahay, gudaha ama dibadda dalka, la furin iyada oo aan oggolaansho qoraal ah looga haysan Wasiirka.

3. Habraacyada loo marayo hawlaha furista, xiridda, hawl-gelinta iyo saxiixidda xisaabaha bankiyada ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ayaa ay qori doonaan ***xeer-nidaamiyeyaal*** hoos taga Xeerkan. Wasiirku waxaa uu sidoo kale soo saari karaa **tilmaamo** iyo dhabbe-tusayaal ku aaddan hawlgelinta (ka shaqeynsiinta) xisaabaha bankiyada.

**Madaxa VII. Xisaabaadka iyo Warbixinnada**

**Qaybta 30aad. Xisaabaadka**

1. Xeerarka iyo Jaangooyooyinka Xisaabaadka ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay waafaqsanaadaan mabaa'diida caalami ahaan la isla oggol yahay, waana in si joogto ah ay u adeegsadaan dhammaan hay'adaha dowladda, oo ay ka mid yihiin hay'adaha haysta madax-bannaanida hoose, ama qayb-hoosaad kasta oo hoos tagta Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo heer degaan ah, haddii ay tahay midda hadda jirta ama mid mustaqbalka la dhisi doonaba.

2. Wasiirka ayaa mas'uul ka ah sameynta Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Jaangooyooyinka Xisaabaadka ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Kuwani waxaa

lagu dhigayaa ***xeer-nidaamiyeyaasha xisaabaadka*** ee uu dejin doono Xeerkan, waxaana lagu sii faahfaahin doonaa ***tilmaan-bixinno*** iyo *dhabbe-tuseyaal* uu soo saarayo Wasiirka.

3. ***Xeer-nidaamiyeyaasha xisaabaadka*** waa in ay sidoo kale ka mid ahaadaan xeer-nidaamiyeyaal iyo jaangooyooyin gaar ah oo loo adeegsado xisaabaadka gargaarka ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaasha ee la siiyo dowladda ee aan soo marin nidaamka xisaabaadka ee dowladda.

4. Wasiirku waa in uu soo saaraa shaxda xisaabaadka iyada oo ah Qayb Xisaabeed ku jirta Qaab-dhismeedka Kala-soocidda (Baadi-soocda) Miisaaniyadda, taas oo ay tahay in ay waafaqsanaato qaab-dhismeedka loogu talogaley kala-soocidda (baadi-sooca) miisaaniyadeed ee lagu sheegey Xeerkan iyo ***xeer-nidaamiyeyaasha*** la socda.

5. Wasiirku waa in uu Wasaaradda dhismaheeda ka sameeyaa goob dhexe oo lagu sameeyo xisaabaadka taas oo hawlaheeda lagu qeexi doono ***xeer-nidaamiyeyaal*** la soo saari doono oo hoos imaanaya Xeerkan:

6. Wasiir kasta ama hay'ad miisaaniyadeed oo kasta waxaa ay mas'uul ka tahay, iyada oo raacaysa dhabbe-tusayaasha Wasiirka, in ay cid ay hawsheedu tahay xisaabaadka ay wasaaradda/hay'adda uga dhex sameysaa si waafaqsan shuruudaha ay dhigayaan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** **tilmaan-bixnta** iyo dhabbe-tusayaasha xisaabaadka ee hoos imanaya Xeerkan.

7. Wasiir kasta ama madaxa hay'ad miisaniyadeed kasta waxaa uu mas'uul ka yahay fayl-gareynta, ilaalinta iyo haynta dhammaan dokumentiyada la xiriira wax-is-dhaafsiyada maaliyadda maamulka/dadweynaha, in uu u hayo sida iyo waqtiga ay dhigayaan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** hoos imanaya Xeerkan.

**Qaybta 31aad. Warbixinta**

1. Waa mas'uuliyad guud oo uu Xeerkan saarey dhammaan saraakiisha dowladda ee maamula wax-is-dhaafsi la halmaala maaliyadda maamulka/dadweynaha in ay hubiyaan in macluumaadka maaliyadeed looga soo warbixiyo waqtigii ku habboonaa, si faahfaahsan, oo sax, iyo si waafaqsan habka ay sheegeyaan Xeerkan, iyo ***xeer-nidaamiyeyaasha***, iyo **tilmaamaha** hoos yimaada ee uu soo saaro Wasiirka.

2. Hay'ad/wasaarad kasta oo kharash-gareyneysa lacag waxaa halkii ay ku habboon tahay looga baahan yahay in warbixin bille ah ay dakhliga iyo mid saddex-biloodle ah oo kharashaadka ku saabsan ay siiso Wasiirka iyada oo waxa ku jira, qaabka loo qorayo iyo waqtiga lagu qorayo ay sheegi doonaan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** hoos imaanaya Xeerkan.

3. Marka laga soo tago qodobbada ku jira Qaybta 31.2 ee kore, hay'adaha/wasaaradaha kharash-gareynaya waxaa intaa u dheer in laga doonayo in ay saddexdii biloodba mar Wasiirka u soo gudbiyaan xisaabaha hay'adda kharash-gareyneysa taas oo ka kooban qoraalka lacagta caddaanka ah ee soo geleysa iyo tan baxaysa iyo qoraalka dakhliga iyo kharashaadka ee la xiriira Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya wixii loo gaaro dhammaadka saddexda bilood; iyo faahfaahinta kale ee ay qoraan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** laga soo saari doono Xeerkan.

4. Si ku fadhida macluumaadka laga helo Hay'ad/Wasaarad kasta oo kharash-gareyneysa miisaaniyad, Wasiirku waa in uu soo saaraa warbixin mideysan oo saddex-biloodle ah oo ka kooban macluumaadka fulinta miisaaniyadda iyo dakhli-ururinta ee qiyaasihii ku jirey Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Warbixintan waa in ay Madaxweynaha, Baarlamaanka iyo dadweynaha ku heli karaan muddo afartan iyo shan (45) maalmood ah ka dib marka ay dhammaato muddada saddexda bilood ah. Qaabka warbixinnadan billaha iyo kuwa saddex-biloodlaha ah ay yeelanayaan waxaa qori doona ***xeer-nidaamiyeyaal*** hoos yimaada Xeerkan.

**Qaybta 32aad. Xisaabta ugu Dambeysa ee Miisaaniyadda Mideysan iyo Hantidhowrka Madax banaan**

1. Wasiirku waa in uu diyaariyaa Xisaabta Kama-dambeysta ah ee Miisaaniyadda Mideysan ee aan weli hantidhowr lagu sameyn waana in uu u gudbiyaa Hantidhowrka Guud ugu dambeyn afar (4) bilood ka dib marka uu dhammaado sanad-maaliyadeedka.

2. Xisaabaha Kama-dambeysta ah ee Miisaaniyadda Mideysan ee aan weli hantidhowr lagu sameyn waa in ay waafaqsanaadaan waxyaabaha ay ka kooban tahay iyo kala-sooca (baadi-soocyada) miisaaniyadda. Waxyaabaha ku jira, qaabka, waqtiga iyo habraacyada loo marayo diyaarinta iyo gudbinta Xisaabta Kama-dambeysta ah ee Miisaaniyadda Mideysan waa in ay qeexaan ***xeer-nidaamiyeyaasha xisaabaadka*** ee hoos imaanaya Xeerkan.

3. Hantidhowrka Guud waa in uu eegaa Xisaabta Kama-dambeysta ah ee Miisaaniyadda Mideysan ee uu soo diyaariyey Wasiirku oo uuna warbixin hantidhowr, oo ay la socoto Xisaabta Kama-dambeysta ah uu u gudbiyaa Baarlamaanka ugu dambeyn afar (4) bilood ka dib marka uu Xisaabta Kama-dambeysta ah ee aan hantidhowrka lagu sameynin ka helo Wasiirka. Warbixinta hantidhowr ee Hantidhowrka Guud waa in ay ku jiraan jawaabo iyo faahfaahinta uu Wasiirku ka bixiyey waxyaabihii u muuqdey

iyo faallooyinkii uu Hantidhowrka Guud ka bixiyey xisaabaha aan hantidhowrka lagu sameyn.

5) Hantidhowrka Guud waa in uu warbixinta hantidhowrka ku faafiyaa Faafinta Rasmiga ah (*Official Gazette*) waana in uu ka dhigaa mid ay heli karaan Baarlamaanka iyo dadweynaha muddo bil gudaheed ah markii uu dhammeystirey warbixintaa hantidhowr ee la soo sheegey.

## Madaxa VIII. Amaah-qaadashada, Daymaha Maamulka, Damaanadaha Dowladda iyo Maareynta Gargaarka

### Qaybta 33aad. Qaabka-guud ee Maareynta Gargaarka iyo mas'uuliyadaha ururrada aan dowladiga ahayn

1. Marka laga soo tago qodobbada qaybta 12 ee ku saabsan lifaaqyada miisaaniyadda la soo jeediyey, iyo Qaybta 30(3) ee ku saabsan xisaabinta kheyraadka deeq-bixiyeyaasha ee aan miisaaniyadda soo gelin, dhammaan hay'adaha/wasaaradaha kharash-gareynaya waa in ay si buuxda ugu sheegaan Wasiirka, dhammaan macluumaadka la xiriira maaliyadda uu bixiyo deeq-bixiye ee aan la soo marin miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Wasiirku waa in uu hubiyaa in ay jiraan qaabab dad ku filan oo lagu ururiyo, lagu keydiyo, lagu lafaguro oo looga warbixiyo macluumaadkan.

2. Iyada oo la raacayo qodobbada Qaybta 33(1) ee kore, dhammaan hay'adaha/wasaaradaha kharash-gareynaya ee deeq-bixiye ka heley maaliyad aan la soo marin miisaaniyadda waa in, muddo toddoba (7) maalmood oo la shaqeynayo gudaheeda, ay nuqullo ka mid ah heshiisyada iskaashiga ee u habboon iyo heshiisyada is-fahamka ugu soo gudbiyaan Wasiirka.

## Madaxa IX. Kantaroolka Gudaha iyo Hantidhowrka

### Qaybta 34aad. Kantaroolka Gudaha iyo Hantidhowrka

1. Wasiirrada wasaaradaha kale iyo madaxda wakaaladaha iyo hay'adaha dowladda ayaa ugu dambeynta mas'uul ka ah dhammaan hawlgallada iyo wada-tacaamulka maaliyadeed ee ka dhaca hay'adahooda/wasaaradahooda, kuwaas oo ay ka mid yihiin unugyada hoose ee ay kormeeraan ama ay kantaroolaan. Wasiirka ama madaxa waxaa gacan siinaya hantidhowrka gudaha, oo si toos ah warbixinta u soo siinaya, kaas oo hawshiisu ay ka mid ahaaneyso waxyaabahan iyo kuwo kale:

    (a) In uu muddo ka dibna dib-u-eego maareynta maaliyadda ee hay'adda ama unugga

    (b) In uu daraaseeyo sida loo raacayo dhammaan habraacyada iyo geeddi-socodyada maareynta maaliyadda ee ku qoran Xeerkan, ***xeer-nidaamiyayaashiisa*** iyo **tilmaamaha (amarrada)** uu soo saaro Wasiirka;

    (c) In uu qiimeeyo sida ay dad ugu filan yihiin baaritaannada iyo is-dheellitirka (*checks and balances*), iyo kantaroolka, ee hab-dhaqannada maareynta maaliyadeed ee ay leeyihiin hay'adda ama unugga; iyo

    (d) In uu wasiirka wasaaradda kale ama madaxda hay'adda kula taliyo tallaabooyin sixid ah halka looga baahan yahay ama halka ay ku habboon yihiin iyo in uu sidaa u ogeysiiyo Wasiirka.

2. Hawsha, mas'uuliyadaha warbixineed, iyo waxqabadyada hantidhowrka gudaha waa in lagu sharxaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** laga soo saaro Xeerkan, kuwaas oo ay dhammeystirayaan ***tilmaamo (amarro)*** iyo *dhabbe-tusayaal* uu soo saaro Wasiirka isaga oo kaashanaya Hantidhowrka Guud.

3. Sida uu dhigeyo Xeerkan, dhammaan warbixinnada hantidhowrka ee ay diyaariyaan hantidhowrayaal gudaha hay'adda ka shaqeeya oo si toos ah qandaraas looga siiyey mashaariicda ay deeq-bixiyeyaashu maalgeliyaan waa in nuqullo laga siiyaa hantidhowrka gudaha ee wasaaradda mashruucaas uu hoos tegayo.

4. Warbixinnada hantidhowrka gudaha waa in uu heli karaa Hantidhowrka-Guud. Hantidhowrka Guud waa in uu soo saaraa warbixin sanadeed hantidhowr oo ku saabsan kantaroolka gudaha ee warbixinnada maaliyadeed taas oo ay ka mid tahay qiimeynta hantidhowrka gudaha.

**Madaxa X Ciqaabaha kala duwan**

**Qaybta 35aad. Ciqaabaha**

1. Ku xadgudbidda qodob kasta oo ka mid ah Xeerkan ama **xeer-nidaamieyaashiisa** waxaa ka dhalanaya ciaqaabaha ay sheegeen shuruucda maamul ama ciqaabeed ee u habboon.

2. Ciqaabaha ka dhalanaya ku xadgudbidda qodobbada Xeerkan waxaa ay noqon karaan kuwo maamul ama kuwo ciqaabeed taas oo hadba ku xiran in xadgudubkaasi yahay sharci-jebin yar, dembi yar, ama dembi weyn.

**CUTUBKA C DHAQANGALKA LA DIB-DHIGEY**

**Madaxa XI. Diyaarinta iyo Ansaxinta Miisaaniyadda**

**Qaybta 36aad. Dokumentiyada iyo Waxyaabaha ku jira Miisaaniyadda La Soo Jeediyey**

1. Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah ee uu Wasiirka u soo bandhigey Baarlamaanka waa in ay ku jiraan dokumentiyada soo socda:

   (a) Lifaaq sheegaya deymaha iyo damaanadaha lagu leeyahay maamulka/dowladda.

   (b) Lifaaq soo koobaya hawl-gallada maaliyadeed ee hay'ad kasta oo madax-bannaani hoose haysata, iyada oo hay'ad kasta la sheegayo lacagta (kheyraadka) laga siinayo Miisaaniyadda Mideysan.

   (c) Lifaaq soo koobaya qorsheyaasha (miisaaniyadda) maaliyadeed ee sanadka iyo hawlgallada hay'ad/ganacsi/wakaalad kasta oo uu qaranku leeyahay. Qaabab gaar ah oo loogu talogaley ayaa lagu tilmaami doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** laga soo saarayo Xeerkan.

**Madaxa XII. Maareynta Lacagaha Caddaanka ah iyo La-tacaamulka Bankiyada (Waa La-Dib-Dhigey)**

**Qaybta 37aad. La-tacaamulka Bankiyada**

1. Xisaabta Banki ee ugu weyn ee ay leedahay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in laga furaa Laanta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, taas oo ay tahay in la dhigo dhammaan dakhliga iyo in laga bixiyo dhammaan kharashaadka.

2. Wasiirku, waxaa uu marka uu kula heshiiyo Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, oggolaan karaa xisaabo banki oo kale laga furo Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo in xisaabo kale laga furo bankiyada ganacsiga ee degaanka iyo kuwa ajnabiga ah, si ay u ahaadaan xisaabo ku-meelgaar ah oo fududeeya dakhli-ururinta ama kharash-bixinta. Faahfaahinta la xiriirta maareynta xisaabahan ku-meelgaarka ah waxaa lagu bixin doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** ama tilmaamo laga soo saari doono Xeerkan.

## Madaxa XIII. Amaah-qaadashada, Daymaha Maamulka, Damaanadaha Dowladda iyo Maareynta Gargaarka

### Qaybta 38aad. Amaah-qaadashada Dowladda

1. Si waafaqsan xuduudda awoodda uu Baarlamaanku siiyey waqtiga la ansaxinayo Miisaaniyadda Mideysan, ama waqti kasta oo kale oo ka mid ah sanad-maaliyadeed, Wasiirka ayaa si gaar ah mas'uul uga ah kormeeridda in lacag amaahashada Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ay u dhacdo si waafaqsan ***xeer-nidaamiyeyaasha*** gaarka ah ee laga soo saarey Xeerkan. Arrintan waxaa soo hoos-gelaya amaahda gudaha iyo dibadda, iyo sidoo kale amaahaha la fududeeyey iyo kuwa qiimaha suuqa caadiga ah lagu qaateyba, iyo amaahda muddo gaaban la qaato oo lagu buuxiyo lacagaha dhinnaada ee markaa aan la haynin.

2. Wasiirku waa in uu soo saaraa dhabbe-tuseyaal, ka hadlaya shuruudaha la doonayo in laga soo baxo ee heshiisyada amaahaha.

3. Dhammaan heshiisyada amaahda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in uu saxiixaa Wasiirka oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

4. Dhammaan dakhliga ku yimaadda amaahashada waa in lagu shubaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan marka laga reebo dakhliga amaahaha ee toos ay hay'adaha deeq-bixiyeyaashu ugu diraan qandaraaslayaasha iyo kuwa wax laga soo iibsado, iyo deymaha ay qaataan Wakaaladaha/Ganacsiyada Dowladdu Leedahay iyo hay'adaha/wakaaladaha kale ee madax-bannaanida hoose haysta ee aan si toos ah ugu jirin gacanta Dowladda Dhexe,

### Qaybta 39aad. Damaanadaha Dowladda

1. Wasiirka oo keliya ayaa awood u leh in isaga oo wakiil ka ah Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya uu damaanad qaado amaah ay qaadatey wakaalad/ganacsi ay dowladdu leedahay, ama hay'ad maaliyadeed oo dowladdu leedahay, ama hay'ado kale iyada oo amaahdaasi ku kooban tahay xadka uu u dejiyey Baarlamaanku markii

uu ansaxinayey Miisaaniyadda Mideysan. Waa in uu Wasiirka ansaxiyaa dhammaan damaanadaha amaahda. Faahfaahinta soo saarista iyo ansaxinta damaanadaha noocaas ah waxaa lagu sheegi doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** laga soo saarayo Xeerkan.

2. Dhammaan qandaraaasyada ay ku jiraan ballanqaadyo ku xiran maaliyad bixinteedu ay damaanad qaadday Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ama Ganacsi/Wakaalad ay Dowladdu Leedahay waa in uu ansaxiyaa Wasiirka. Maaliyad la damaanad-qaadey waxaa ka mid ah laakiin kuma kooban (i) ballanqaad kasta oo lagu ballanqaado bixinta ama waajibaadka lacag-bixinta ee Cid kale, (ii) heshiis kasta, oo uu ku jiro heshiis magdhow ah, oo Qof kale lagaga ilaalinayo in wax loo qabsado ama in caymis-bixin ama ilaalin kale oo cid laga ilaaliyo halista in ay wax ka lumaan, (iii) damaanad kasta oo Qof kale loogu damaanad qaadayo faa'iido dhaqaale oo ay ka mid yihiin damaanad-qaad faa'iido, dakhli ama faa'iido nisbo cayiman ah, (iv) heshiis kasta oo lagu galo taageero maaliyadeed oo Qof kale la siinayo oo la xiriira waxqabadyo gaar ah oo Qofkaa uu ku jiro, iyo (v) heshiis kasta oo kale oo ay dhigayaan xeer-nidaamiyeyaasha laga soo saaro Xeerkan.

3. Ganacsiyada/hay'adaha ay Dowladda Leedahay ama wakaaladaha madax-bannaanida hoose haysta ee aan toos u hoos imaanin gacan-ku-haynta Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ka damaanad-qaaddey cid kale, waa in ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ugu soo celiyaan sida iyo waqtiga uu Wasiirku faro, dhammaan wadarta lacagta ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya bixiso iyada oo fulineysa damaanad-qaadkaa, iyo dhammaan kharashaadka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya kaga baxa damaanad-qaadkaa.

4. Habraacyada loo marayo dib-u-eegista iyo ansaxinta damaanad-qaadyada ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa go'aamin doona ***xeer-nidaamiyeyaal*** gaar ah oo laga soo saarayo Xeerkan.

**Qaybta 40aad. Qaabka-guud ee Maareyta Gargaarka iyo mas'uuliyadaha ururrada aan dowliga ahayn**

1. Ururrada aan dowliga ahayn ee hirgelinaya barnaamijyo horumarineed oo lagu maalgelinayo maaliyad dadweyne, oo ay ku jirto lacagta deeq-bixiyeyaasha, waa in lala xisaabtamaa iyada oo loo marayo in warbixinno maaliyadeed oo joogto ah oo ay diyaariyaan iyo in xisaab-sanadeedkooda lagu sameeyey hantidhowrka ay u soo gudbiyaan wasaaradda kormeerkooda ku shaqo leh. ***Xeer-nidaamiyeyaal*** ayaa sii faahfaahin doona habka, nidaamka, iyo bar-bilowga *(threshold)* NGO-yada laga doonayo shuruuddan.

**Qaybta 41aad. Qandaraas-bixinta/Ka-warbixinta Daynta ee Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay iyo Macaahidda Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha**

1. Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waxaa ay qaadan karaan amaaho muddada dhow iyo kuwo muddada dhexe ah waxaana ay bixin karaan waraaqo ballanqaad lacageed ah oo lagu maalgeliyo hanti iyo kharashaadka kale ee aan ahayn kuwa joogtada ah marka ay oggolaansho cad ay ka helaan Golaha (*the Board*) oo ay Oggolaansho qoraal ahna ay ka helaan Wasiirka. Baarlamaanka waa in uu eegaa qiyaasta lacagta uu Wasiirka soo jeediyey in ay amaahan karaan ganacsiyada/hay'adaha noocaas ah markii uu soo gudbinayey qiyaasaha miisaaniyadda dowladda dhexe ee sanad-maaliyadeedka soo socda.

2. Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waa in aaney damaanad-qaad ku bixin deyn ay qaadatey cid alaabo ama adeeg laga soo iibsado, qandaraasle, ama hay'ad kale marka la reebo kuwa uu ansaxiyo Golahooda iyo marka si cad uu qoraal ugu oggolaado Wasiirka.

3. Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waa in ay lacagaha u harsan kuwa alaabada iyo adeegyada laga soo iibsado ay lacagahooda ku siiyaan muddo 90 maalmood ah oo ka bilaabma markii ay qaateen, haddii heshiis lacag-bixin si gaar ah loogu heshiiyey uu jiro ma ahee. Heshiisyada lacag-bixinta ee muddadoodu ka badan tahay 90 maalmood waxaa loo tixgelinayaa sidii in ay yihiin amaah waana in ansaxin looga helaa Golaha iyo in uu si cad u oggolaado Wasiirka.

4. Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waa in ay ansixin ka raadsadaan Golayaashooda waana in ay Wasiirka oggolaansho uga helaan qorsheyaashooda sanadlaha ah ee amaah-qaadashada ka hor inta aanu bilaaban sanad-maaliyadeedkooda, marka lagu daro dib-u-habeynta deymaha ee laga yaabo in ay sameeyaan, taas oo ay tahay in ay si buuxda uga muuqato qorsheyaashooda maaliyadeed ee sanadlaha ah.

5. Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee ay dowladdu leedahay waxaa laga doonayaa in dhammaadka saddex-bilood ee kasta, ay Wasiirka u soo gudbiyaan warbixin faahfaahsan oo tilmaameysa amaaahashadooda iyo sida ay deymaha isaga bixinayaan, taas oo ay ku jirto deymaha ay dowladdu damaanad-qaaddey, iyo sidoo kale deymaha dib loo habeeyey, iyo wixii kale ee kuwa alaabada iyo adeegyada laga soo iibsado in la siiyo ay sugayeen muddo ka badn 90 maalmood.

6. Waajibaadyada la xiriira amaahashada, dib-u-habeynta deymaha iyo ka soo warbixinta daymaha ee ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waa in lagu sii faahfaahiyaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** laga soo saaro Xeerkan.

**Qaybta 42aad. Diiwaangelinta Daymaha Maamulka/Dowladda iyo Ka-warbixintooda**

1. Wasiirka waxaa ku waajib ah in uu si joogto ah u diiwaangeliyo dhammaan deymaha lagu leeyahay dowladda, kuwaas oo ay ka mid yihiin damaanadaha. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sameynaya oo haynayana diiwaanno iyo macluumaad ku saabsan cidda haysata waraaqaha ballanqaadka maaliyadeed ee dowladda.

2. Lacagaha baaqiga urarey ah ee kuwa laga soo iibsado alaabada iyo adeegyada u hara dhammaadka sanad-maaliyadeedka waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin amaaho waxaana loo qorayaa in ay amaah yihiin, waxaana sida loo bixinayo lagu darayaa, laguna sheegayaa, deyn-bixinta.

3. Sanadkii laba jeer, Wasiirku waa in uu diyaariyaa uuna Madaxweynaha iyo Baarlamaanka u gudbiyaa warbixin tilmaameysa amaahaha cusub iyo damaanahada la bixiyey, iyo sidoo kale deymaha la bixiyey, waqti kale loo qabtay, la tirtiray, iyo kuwa la wada bixiyey. Wasiirku waxaa uu diyaarinayaa uuna baahinayaa warbixin ku saabsan deymaha maamulka/dowladda weli lagu leeyahay iyo sidoo kale saadaasha deyn-bixinta ee muddada dhexe.

4. Wasiirku waa in uu hubiyaa in ay jirto istiraatiijiyad deymeed oo muddo kadibba wax laga beddelo lana baahiyo taas oo muujineysa faahfaahinta shuruudaha amaahaha cusub iyo sidoo kale deymaha iyo damaanadaha ay dowladdu damaanad qaadi karto waqtiyo kala duwan.

**Madaxa XIV. Hay'adaha Madax-bannaanida Hoose haysta iyo Sanaadiiqda Gaarka ah(Waa La Dib Dhigey)**

**Qaybta 43aad. Ku-dhaqanka qodobbada guud ee maareynta maaliyadda ee uu dhigeyo Xeerkan**

1. Hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta iyo Sanaadiiqda Maaliyadeed ee Gaarka ah ee sida tooska ah uu gacanta ugu hayo Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay raacaan isla xeerarka maareynta maaliyadeed iyo in ay raacaan isla sanad-maaliyadeedka ay dowladdu raacdo.

2. Hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta iyo Sanaadiiqda Maaliyadeed ee gaarka ah waa in ay si buuxda oo habboon u diiwaangeliyaan arrimaha maaliyadeed ee hay'adda si waafaqsan xeerarka iyo habraacyada u habboon ee ay u dejiyeen Xeerkan iyo ***xeer-nidaamiyeyaashiisa***.

3. Hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta iyo Sanaadiiqda Maaliyadeed ee Gaarka ah waa in ay Xisaabaadkooda Sanadlaha ah ay Wasiirka, Wasiirka Qaybta (*Sector Minister*) iyo Hantidhowrka Guud ugu soo gudbiyaan labada bilood ka dib dhammaadka sanad-maaliyadeedka.

**Qaybta 44aad. Soo-gudbinta iyo Dhammeynta Miisaaniyadaha hay'adaha madax-bannaanida hoose, madax-bannaani yar haysta iyo tan Sanaadiiqda Gaarka ah**

1. Hay'ad madax-bannaani hoose haysata iyo Sanduuq Maaliyadeed oo Gaar ah oo kasta waa in ugu yaraan afar bilood ka hor inta uusan bilaaban sanad-maaliyadeedka dowladda ay Wasiirka u soo gudbiyaan:

   (a) Miisaaniyaddooda oo loo sameeyey habka iyo qaabka uu Wasiirku sheegey. Wasiirka waa in uu eegaa miisaaniyad-soo-jeedimahaa uuna Madaxweynaha iyo Baarlamaanka sidaa ugu sheegaa/talo-siiyaa.

   (b) Qoraal muujinaya cidda laga heley iyo hadafka laga leeyahay gargaar kasta oo laga filayo in deeq-bixiye laga helo inta lagu jiro sanad-miisaaniyadeedka;

   (c) Qoraal muujinaya amaah kasta oo aan weli la bixin, oo ay ku jiraan lacagaha ururey ee ay dad ku leeyihiin kuwa laga soo iibsado alaabada iyo adeegyada;

2. Wasiirku waa in uu hay'adda madax-bannaanida hoose haysata iyo Sanduuqa Maaliyadeed ee Gaarka ah ogeysiiya go'aanka ugu dambeeya ee la xiriira qiyaasta maaliyad-siinta ay ka heli karaan Miisaaniyadda Mideysan, ee la isla gartey waqtigii munaaqashooyinka, waana in uu ka codsadaa in ay mar kale soo gudbiyaan miisaaniyad lagu noqdey haddii ay dhacdo in maaliyad-siintu ay ka duwan tahay midda ay codsadeen.

**Qaybta 45aad. Warbixinnada sanadka dhexdiisa iyo Xisaabaadka Sanadlaha ah ee hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta, kuwa madax-bannaanida yar haysta iyo Sanaadiiqda Gaaarka ah ay soo saaraan**

1. Hay'ad madax-bannaani hoose haysata iyo Sanduuq Maaliyadeed Gaar ah oo kasta waa in ay soddon (30) maalmood gudahooda ka dib marka ay dhammaadaan saddex-bilood oo kasta ay Wasiirka u soo gudbiyaan warbixin maaliyadeed, oo u sameysan habka iyo qaabka ay u sheegeen ***xeer-nidaamiyeyaasha*** iyo **tilmaamaha (amarrada)** uu soo saarey Wasirka isaga oo tixraacaya Xeerkan, iyaga oo dakhliga iyo kharashaadka dhabta ah barbardhigaya qorshayaashoodii miisaaniyadeed ee la ansaxiyey.

2. Marka laga reebo Hantidhowrka Guud, hay'ad madax-bannaani hoose haysata iyo Sanduuq Maaliyadeed oo kasta waa in ay diyaariyaan warbixinnada maaliyadeed ee sanad kasta ayna warbixinnadaa maaliyadeed muddo laba bilood gudahood ah ka dib marka uu dhammaado sanad-maaliyadeedka u gudbiyaan Wasiirka iyo Hantidhowrka Guud. Waa in Hantidhorka Guud uu diyaariyaa xisaabaha sanadka ee Hantidhowrka Guud uuna u gudbiyaa Baarlamaanka iyo Madaxweynaha isla waqtigii hay'adaha madax-bannaanida hoose haysta iyo Sanaadiiqda Maaliyadeed ay qaybtan ku siisey. Habka, qaabka iyo waxyaabaha ku jira warbixinnada maaliyadeed waxaa lagu sheegayaa *xeerarka (xeer-hoosaadyada)* maaliyadeed iyo xisaabeed ee hoos tegeya Xeerkan.

**Qaybta 46aad. Lacagaha Dheeriga ka ah baahidooda ee ay bixiyaan hay'adaha madax-bannaanida hoose iyo kuwa madax-bannaanida yar haysta**

1. Marka laga soo tago qodobbada ku jira sharciga lagu dhisey sharikadda dowladdu leedahay, Wasiirka iyo Wasiirka Wasaaradda Waaxdaa (*Sector Minister*) iyaga oo la tashanaya Golaha Agaasimayaasha (*Board of Directors*) waa in ay sharikadda dowladdu leedahay faraan in ay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ku soo wareejiso lacagta ay maamusho ee ka badan tirada ay ugu baahan tahay ahdaafta sharikadda.
2. Lacag kasta oo sidaa lagu bixiyo waxaa loo qaadan karaa sidii dakhli soo galey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

**Madaxa XV. Qodobbo gaar ah oo la xiriira Wakaaladaha Dowladdu Leedahay (Waa La Dib Dhigey)**

**Qaybta 47aad. Hawsha loo igmadey iyo Baaxaddeeda**

1. Maamulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa uu sameynayaa qabanqaabooyinka hay'adeed ee arrimaha la xiriira maamulka iyo dejinta siyaasadda iyo kormeerka Ganacsiyada/Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay.
2. Waxa loo sameynayo, hawlaha, iyo habka hawlgalka iyo warbixinnada looga baahan yahay ganacsiyada/wakaaladaha ay dowladdu leedahay waa in lagu maamulaa sharciga dhisaya sameynta ganacsi/wakaalad ay dowladdu leedahay, sharciga sameynaya awoodda kormeer ee hadba wax laga beddelo, iyo sharci kasta oo kale.
3. Iyada oo aan la xaddideynin sida guud ee ay u hadlayaan faqradaha (1) iyo (2) ee kore, qodobbada qaybtan, iyo sidoo kale qaybaha 38, 39, 40, 41, iyo 42 ee la xiriira deymaha, amaahashada, damaanadaha maamulka/dowladda iyo ka-warbixinta

deymaha, waxaa iyada oo aan midna laga soo reebin lagu maamulayaa ganacsiyada/wakaaladaha dowladdu leedahay iyaga oo qodobbadaa weliba leh mudnaanta koowaad.

**Qaybta 48aad. Qorsheyaasha Maaliyadeed ee Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay**

1. Qorshaha Istaraatiijiga ah iyo qorsheyaasha maaliyadeed ee ganacsi/wakaalad kasta oo ay dowladdu leedahay waa in uu ansaxiyaa golaha waana in nuqullo ka mid ah loo diraa Wasiirka Wasaaradda Waaxdaa ay hoos tagto iyo Wasiirka.

2. Wasiirka ayaa fari kara qaabka ay tahay in loo diyaariyo qorsheyaasha maaliyadeed ee ay waajibisey qaybtan.

**Qaybta 49aad. Warbixinnada sanadka dhexdiisa iyo Xisaabaadka Sanadlaha ah ee Ganacsiyada/Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay**

1. Ganacsiyada/wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay waa in ay, muddo bil ah oo ka bilaabata dhammaadka saddexdii bilood ee ka horreeyey, qoraalladooda maaliyadeed ee saddexda bilood ah ugu soo gudbiyaan Wasiirka, Wasiirka Waaxda (*Sector Minister*). Xisaabtanka maaliyadeed iyo warbixinnada kale ee looga baahan yahay Ganacsiyada/Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay waxaa lagu sheegi doonaa ***xeer-nidaamiyeyaal*** daba-socda Xeerkan.

2. Ganacsiyada/Wakaaladaha ay Dowladdu Leedahay waa in ay Warbixinnadooda Sanadlaha ah diyaariyaan una gudbiyaan Wasiirka, Wasiirka Waaxda, Hantidhowrka Guud iyo Xafiiska Ganacsiyada/Wakaaladaha Dowladda laba bilood ka dib dhammaadka sanad-maaliyadeedka ay la xiriiraan. Hantidhowrka Guud waa in uu dib u eegaa Warbixin Sanadeedka oo uu fikirkiisa ku aaddan u gudbiyaa Baarlamaanka iyada oo ay wada socdaan warbixinta hantidhowrka ee hawlgallada maaliyadeed ee dowladda ee sanad-maaliyadeedkii la soo dhaafey.

3. Wasiirku waa in uu qoraal ku aaddan sida guud ahaan ay tahay xaaladda Ganacsiga/Wakaaladda Dowladdu Leedahay u gudbiyaa Baarlamaanka iyada oo ay wada socdaan soo-jeedimaha miisaaniyadda ee sanadka soo socda.

**Qaybta 50aad. Siyaasadda Faa'iido-qaybinta**

1. Goluhu waa in uu mas'uul ka noqdaa dejinta Siyaasadda Guud ee Ku Aadan Faa'iido-qaybinta waana in uu hubiyaa in siyaasaddaas ay raacaan ayna ixtiraamaan maamulka ganacsiga/wakaaladda ay dowladdu leedahay, iyaga oo tixgelin ku filan la siinayo danta maaliyadeed ee ganacsiga/wakaaladda.

2. Faa'iidada la qaybinayo ee laga filayo ganacsi ay dowladdu leedahay waa in lagu muujiyaa Miisaaniyadda Mideysan ee sanadlaha ah ee loo bandhigay Baarlamaanka.

3. Marka ganacsi ay dowladdu leedahay uu sameynayo faa'iido xad-dhaaf ah, goluhu waa in uu ogeysiiyaa Wasiirka iyo Wasiirka Waaxda isaga oo raacinaya soo-jeedin ku aaddan faa'iido-qaybin kale oo ay ka fekeraan ayna oggolaadaan iyaga oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

4. Dhammaan faa'iidada la qaybiyo waa in la geliyaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan.

5. Lacagta faa'iidada la qaybinayo waa in aan loo xisaabin in ay tahay canshuur (ama) wax (kale) oo ganacsiga/wakaaladda gaarka loo leeyahay ay dowladdu ka rabtey.

## CUTUBKA DHAQANGALKA

**Maxada XVII.** **Qodobbada Kama-dambeynta ah**

**Qaybta 51aad.** **Dhaqangalka**

1. Xeerku waxaa uu dhaqangeleyaa **25 febraayo 2018**, marka laga reebo qodobbada ku jira Madaxa C – OO DHAQANGALKOODA DIB LOO DHIGEY ee Xeerkan kuwaas oo hadba dhaqangal noqonaya waqtiyada uu go'aansado Wasiirka.

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweyne Ku xigeenka

جمهو ريةالصوما لالفيد را لية
حكومة اقليم هر سبيلي
مكتب نائب الرئيس

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the Vice President

**Ref: DGHSH/XMKX/0018/018** **Tr: 06/02/2018**

**Ku: Guddoonka Baarlamaanka Dowlad G. Hirshabeelle** **"Jowhar"**

**Og: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle** **"Jowhar"**

**Ujeeddo: Codsi "Ansaxin Hindise Sharciyeedyo dhowr ah"**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan si xushmad leh idinkaga codsanaynaa in la ansaxiyo Hindise Sharciyada hoos ku qoran kuwaas oo Wasiirka Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha uu soo hordhigay Kalfadhiga Golaha Wasiirada DGHSH taarikhdu markay ahayd **05/02/2018**.

1- Xeerka lagu dhisyo Wasaarada Maaliyada & Horumarinta Dhaqaalaha
2- Xeerka Dhakhliga
3- Xeerka Maareynta Maamulka Maaliyad/dadweynaha

Golaha Wasiirada Dowlad Goboleedka Hirshabeelle waxay cod aqlabiyad leh ku ogolaadeen isla taariikhda aan soo sheegnay "Hindise Sharciyeedyada kor ku xusan".

Haddaba anagoo tixgelinayna horumarinta nidaamka Dowliga ah iyo dardar gelinta shaqooyinka kala duwan ee looga fadhiyo Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, waxaan Guddoonka Baarlamaanka DGHSH ka codsanaynaa in la horgeeyo Golaha barlamaanka Hindise sharicyeedaas si loo ansaxiyo.

Mahadsandiin

Mudane Cali C/laahi Xuseen (Cali guudlaawe)

Madaxweyne ku xigeenka Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

XAFIISKA MADAXWEYNE KU XIGEENKA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
مكتب نائب الرئيس
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

**Jamhuuriyada Federalka Somalia**

**Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**Guddiga maaliyada,Qorsheynta iyo Tirakoobka**

---

Ref/014 Tr.23/2/2018

# Warbixinta Guddiga Maaliyada ee Hindise sharciyeedyka.

**Xeerka maareynta maaliyadda maamulka/dadweynaha ee 2018.**

**Ee dowlad-goboleedka hirshabelle somaliya**

J F S ★ DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE
OFFICE OF THE SPEAKER
F R S ★ HIRSHABELLE STATE

## Horudhac

Odoroska Hindise sharciyedkaan 2018 waa hindise sharciyeedkii 2aad ee uu falanqeeyo Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo Tirakoobka Golaha Sharci dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle

Sida kuxusan **Qodobka 45aad** Faqrada **11** Xeer hoosadka Golaha. Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay isagoo wakiil uga ah Baarlamanka Arrimaha Maaliyada iyo Miisaniyada

Guddiga isagoo si guud oo dhameystiran u eegaya Hindise sharciyeedkan ay soo Gudbisay wasaarada Maaliyada Tixgeliyeyna soo jeedimihii Baarlamanka wuxuu Dulmar guud kusameyay kana baaran degay odoroska Hindisedyada ay soo gudbisay Wasaarada Maaliyada 2018 oo loo soo gudbiyey Baarlamanka laguna wareejiyey Guddiga 19.02.2018

**Qeybta 1aad bogga 4aad**

1:Xeerkan baarlamaanku soo saaray waxaa uu magaciisu yahay (**xeerka maareynta maaliyada maamulka/dadweynaha ee 2017**.

Xeerkan ma ahan mid uu baarlamaan soo saaray wasaarada maaliyada ayaa soo saartay sanadka ma ahan **2017** waxaan ku badalnay **2018**.

2:Guddiga, **miisaaniyada mideysan** waxuu ku bedelay miisaaniyada guud.

**Qeybta 2aad bogga 5aad.**

**A** la xisaabtamid waxuu Guddiga ku bedelay isla **xisaabtan.**

**A.**dhamaan xubnaha baarlamaanka waxaa lagula xisaabtamayaa sida eey ugu soo baxaan masuuliyadahooda la xiriira maareynta maaliyadda maamulka dad weynaha.

Guddiga wuxuu qodobkan ku badalay dhamaan xubnaha baarlamaanka wexeey kula xisaabtamayaan wasiirka iyo madaxweynaha sida eey uga soo baxaan masuuliyadahooda la xiriira maareynta maaliyadda maamulka dadweynaha.

**B**.sanadle: awooda qoondeynta miisaaniyada waxaa mudo sanad maaliyadeedka ah bixiya baarlamaanka

Baarlamaan miisaaniyad ma bixiyo ee wuu ansixiyaa wixii eey wasaarada maaliyada soo gudbiso ama wuu diidaa oo wax buu ka bedelaa.

**Qeybta 3aad bogga 6aad**.

Hey'ad madax banaani hoose heysata.

Guddiga waxuu wasiirka usoo jeedinaya inuu cadeeyo Hay'adaha lasiinayo Madaxbanaanida Hoose iyo masuuliyadaha ay leeyihiin ama waajibkooda

**Qeybta 3aad.**

Sanduuqa maaliyadda mideysan

Guddiga wuxu ku bedelay sanduuqa **maaliyada guud.**

**Qeybta 4aad bogga 11aad**.

**C**:dulsaar.

Guddigu waxuu soo jeedinayaa in Dulsaar laga saaro maadama ay tahay ribo aysana ku haboonen in la isticmaalo.

**Qeybta 5aad booga 12aad**.

**1.**madaxweynaha ayaa leh masuuliyadda guud ee arimaha siyaasada ee la xiriira miisaaniyada mideysan iyo hannaanka maareynta maaliyadda maamulka dadweynaha ee dowlad goboleedka hirshabeelle ee somaliya waxaana uu leeyahay awood uu ku qaato go



DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE

aamada iyo talaabooyinka lagama maarmaanka u ah ka soo bixida masuuliyadaha noocaas ah

1.madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka ayaa leh masuuliyadda guud ee arimaha siyaasada ee la xiriira miisaaniyada mideysan iyo hannaanka maareynta maaliyadda maamulka dadweynaha ee dowlad goboleedka hirshabeelle ee somaliya waxaana uu leeyahay awood uu ku qaato go aamada iyo talaabooyinka lagama maarmaanka u ah ka soo bixida masuuliyadaha noocaas ah.

**Qeybta 7aad Bogga 13aad.**

1.xeernidaamiya yaasha uu soo saaro wasiirka isaga oo raacaya xeerkan waa in baarlamaanku dib u eegis ku sameeyaa muddo aan ka badneyn **10 maalin** oo ka bilaabma taariikhda uu wasiirka soo gudbiyo,

Guddiga wuxuu isla gartay in mudadada la ga dhigo **30 maalmood.**

**Qeybta 13aad Bogga 16/17Aad.**

Qodobada **1,2 iyo 3aad** ee uu dhigayo Qeybta **13Aad** ee xerkaan Guddigu waxuu usoo jeedinaya wasiirka inuu faah faahin dheeri ah kabixiyo Qodobadan Kor kuxusan

J.F.S ★ DOWLAD GOBOLEEDKA HI...
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE
OFFICE OF THE SPEAKER
F.R.S ★ HIRSHABELLE STATE

**Qeybta 24Aad Bogga 22-23aad.**

**Qandarasyadda iyo wax soo iibsiga.**

**1.** Xeerka wax soo iibsiga ee soo baxay **2015ka** ee uu qodobka 1aad dhigayo Guddigu waxuu farayaa wasiirka inuu horkena barlamanka si faah faahin dheeri ah loo helo ama macluumad ku aadan xeerkas

**4**. xeerka wax soo iibsiga maamulka/Dowlada iyo wax kabaddelka ilaa haatan lagu sameeyay, waxaa dib u eegaya oo ansixinayo hey'adda dowladda ee u xilsaran arrimaha sharucda dowlada ama cidda ay u wakiilatay.

Maadama aysan jirin hay'ad kale oo sharci dejin aan aheyn Baarlamanka Guddigu waxuu wax kabadal ku sameyay Qodobkaas waxuna kadhigay sida soo socota

Xeerka wax soo iibsiga maamulka /Dowlada iyo wax kabedelka ilaa haatan lagu sameyay waxaa dib u eegaya oo ansixinayo Baarlamanka

**Qeybta 35Aad Bogga 30Aad**

Ciqaabaha uu ka hadlaayo qeybta 35aad ee xerkaan qodobadiisa **1 iyo 2Aad** Guddigu waxuu farayaa wasiirka inuu faah faahin dheeri ah kabixiyo Qodobkaan si loo helo macluumad kusaabsan cida fulineso ama qaadeyso ciqabahaas.

J.F.S DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE
ولاية اقليم هر شبيلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي
OFFICE OF THE SPEAKER
F.R.S HIRSHABELLE STATE

**Cudubka C Kabilabato Qeybta 43Aad Bogga 34Ad ilaa Bogga 38 Aad** Guddigu waxuu soo jeedinayaa in qodobadan dib loo dhigo maadama aysan dhaqan galkooda ku habooneyn xiligaan  Marka laga reebo **Cutubka dhaqan galka** ee kujiro Bogga 38Aad .

FG.

WAXAA MEELO BADAN LAGU XUSAY IN XEER NIDAAMIYE GAAR AH AY YEELANAYAA WAX BADAN OO LA SOO SHEEEGAY Guddigu waxuu suaalo weydinaaya Wasiirka GOORMEE LA HAELAA XEER NIDAAMIYASHAAS HOOSE ?

**Gudomiyaha Gudiga maaliyadda,qorsheynta iyo tirakoobka**

Xildhibaan **Mukhtar Hassan Mohamed**